# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 4aad fadhigii 16aad*

***Wakhtiga uu Furmay: - 09:40*** –11:50 AM
***Taariikhda:- Sabti 22 October 2022***

**Gudoonka: -** Md. Siciid Mire Faarax (Giire)

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga**:- Maalinta 1aad ee Doodda Xeerka Macdanta

**Guddoomiye Md. Siciid Mire:** Alle ha inagu anfaco aayadaha Quraanka Kariimka ah. Mudanayaal, maanta waxa inoo yaalla **Xeerka Macdanta**. Ugu horrayn, waxaan ku soo dhaweynayaa **Guddoomiyaha Guddida Arrimaha Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax-soo-saarka iyo Tamarta**, si uu warbixin inooga siiyo xeerka.

Warbixintaas ka dib, Mudanayaal, waxa aynu bilaabaynaa doodda Xeerka Macdanta. Haddaba, waxaan ku soo dhaweynayaa:

**Md. Jimcaale Axmed Cilmi** (18min 03sec):- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka Golaha Wakiillada, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha Golaha, iyo bahda saxaafadda, ASC. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, maanta waxa inoo yaalla **Xeerka Macdanta**, kaas oo ah xeer leh ahmiyad gaar ah oo quseeya qaranka iyo shacabka reer Somalilandba. Haddii si habboon loo diyaariyo, waa xeer laga faa'iidi karo wax badan.

Xeerkan waxa uu ka hadlayaa arrimo badan, hase yeeshee waxa muuqata in aanu si cad u taaban **doorka ay ku leeyihiin dadka deegaanka** meelaha laga fulinayo macdan-qodista. Sidaa awgeed, halkaas ayaan ka hor marinayaa dooddayda.

**Qodobka 3aad**, oo ka hadlaya dabaqista xeerka, **faqraddiisa 3aad**, waxa ay dhigaysaa: *"Wasiirku xilliyada qaarkood wax ka beddel wuu ku samayn karaa Jadwalka Koowaad, isaga oo ku xusaya Wargeyska Bayaaminta Rasmiga ah."*

**Soo-jeedintaydu waa**: halkaa ma cadda in wax-ka-beddelka wasiirku yahay mid sharci ah iyo in kale. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo sidan: *"Wasiirku xilliyada qaarkood wax-ka-beddel sharci ah ayuu ku samayn karaa Jadwalka Koowaad, haddii ay timaaddo duruufo waajibinaya wax-ka-beddelkaas."*

Sidoo kale, **isla Qodobka 3aad, faqraddiisa 4aad**, waxa ay sheegaysaa in xeerkan lagu dabaqayo macdanaha, isla markaana aan lagu dabaqayn shidaalka iyo gaasta dabiiciga ah. Hase yeeshee, **Cutubka 6aad** waxa ku jira qodobo ka hadlaya baadhista shidaalka, taas oo

muujinaysa is-khilaaf. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in **labadaa meelood la is-waafajiyo**.

**Qodobka 5aad**, oo ka hadlaya lahaanshaha iyo gacan-ku-haynta macdanta, **faqraddiisa 1aad** waxa ay dhigaysaa in dhammaan macdanta laga helo dhulka Somaliland ay tahay hanti ay leedahay Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana ay ka masuul tahay Dawladda Dhexe.

Halkaas waxaan ka odhanayaa: **macdanta laga helo oogada dhulka waa hanti ay leeyihiin shacabka Somaliland**, Dawladda Dhexe-na waxa ay masuul ka tahay sidii ay uga faa'iidaysan lahaayeen. Arrintani waxa ay waafaqsan tahay **Qodobka 12aad, faqraddiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland**, kaas oo dhigaya in khayraadka dabiiciga ah mas'uuliyaddiisu saaran tahay Dawladda Dhexe, si shacabka loogu faa'iideeyo. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in erayga "Dawladda ayaa iska leh" lagu beddelo **"Shacabka Somaliland ayaa iska leh."**

**Qodobka 9aad**, ee ka hadlaya oggolaanshaha dhulka hay'adaha dawladda, waxa uu dhigaya in go'aan lagu bixiyo 30 maalmood gudahood. Waxaan soo jeedinayaa in muddadaas laga dhigo **60 maalmood**, lagana bilaabo maalinta rasmiga ah ee wargelinta.

**Qodobka 91aad**, oo ka hadlaya xuquuqda cidda haysata ruqsadda macdan-qodista, waxa aad ugu soo noqnoqonaya erayga "qof". Waxaan soo jeedinayaa in **ruqsadda la siiyo shirkad**, maadaama qof keligiis ahi aanu si sharci ah u qaadi karin hawlaha macdan-qodista, haddii qofna la xusayo waa in uu noqdaa **qof sharci ah (legal entity)**.

**Qodobka 95aad**, ee awoodaha wasiirka, waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo **awoodaha wasaaradda**. Sidoo kale, **faqraddiisa 1aad, lanbarka 1.1**, halka ay ku qoran tahay "shuruud ama shuruud-la'aan", waxaan qabaa in labadaa erey is-diiddan yihiin, sidaa awgeed waa in mid keliya la doortaa.

Markaan u gudbo **Cutubka 10aad**, oo ka hadlaya caafimaadka, amniga iyo deegaanka, waa halka ay dooddaydu inta badan diiradda saarayso. Shirkadaha macdan-qodistu inta badan ma siiyaan ahmiyad ku filan ilaalinta deegaanka iyo caafimaadka, maadaama ay danaynayaan macaashkooda.

Xeerkan waxa gabi ahaanba ka maqan **doorka iyo xuquuqda dadka deegaanka** laga fulinayo macdan-qodista. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in arrintaas **loo sameeyo cutub gaar ah**, si si cad loogu qeexo kaalinta ay dadka deegaanku ku leeyihiin hawlaha macdan-qodista.

Waxaa muhiim ah in lagu daro faqrado si gaar ah uga hadlaya **ilaalinta iyo daryeelka deegaanka**, lana faahfaahiyo doorka dadka deegaanka, maadaama iyagu yihiin kuwa ay saamaynta ugu badan ku dhacdo, hadday noqoto wasakh, hadhaaga macdanta ama saameynta deegaanka (environmental impact).

Xeerkan waxa uu inta badan ka hadlayaa shirkado, wasaarado, ruqsado iyo oggolaansho, hase yeeshee meelna kama xusin xuquuqda dadka deegaanka. Haddii aynaan xeerka ku darin xaqooda, waxa aynu ku kacaynaa dulmi ka dhan ah dadkaa.

Sidoo kale, xeerku waxa uu sheegayaa in dadka deegaanka lala tashanayo, balse ma cadda in talooyinkooda la qaadanayo iyo in kale. Sidaa awgeed, si uu xeerku u noqdo mid Somaliland anfaca, waa in si cad loogu qeexaa muhiimadda iyo kaalinta dadka deegaanka.

Ugu dambayn, xeerku waxa uu ka hadlayaa u yeedhista maragyada ama dadka ku xadgudba hawlaha macdan-qodista. Arrintaas waxaan qabaa in **wasaaraddu aanay lahayn awood sharci ah oo ay qof ku yeedhi karto**, awooddaasna ay leeyihiin **maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta** oo keliya.

Markaan intaas ka imaado dooddayda, waxaan ku soo gunaanadayaa waxa ka dhalan kara haddii xeerkan, isaga oo sida uu hadda yahay ah, uu Golaha ka baxo:

1. **In is-fahan-waa baaxad leh** ka dhex dhasho shirkadaha macdan-qodista iyo dadka deegaanka ay macdan-qodistu ka socoto, taas oo keeni karta dirir iyo dagaal dhuleed.
2. **In qas iyo is-qabqabsi sharci** ka dhex aloosmo shirkadaha macdan-qodista iyo wasaaradda dhinaca ruqsadaha (tusaale ahaan, haddii wasaaraddu oggolaansho bixiso iyada oo aan dadka deegaanka lagala tashan, shirkadduna sidaas ku tagto deegaanka lagana soo eryo; cidda lala murmi doonaana waa wasaaradda).
3. **Inay saamayn taban ku yeelato dadka daciifka ah**, ee aan lahayn awood iyo aqoon ku filan oo ku saabsan macdan-qodista iyo saameynteeda.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, xeerkan waa in ahmiyad gaar ah la siiyaa, iyadoo la eegayo **dadka deegaanka, doonistooda, iyo kaalinta ay ku yeelan karaan hawlaha macdan-qodista**. Waxaan leeyahay: yeynaan hor-cararin shirkado macaash-doon ah, ee aynu eegno waxa u danta ah dadka deegaanka.
**Waad mahadsan tihiin.**

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf (23min 09sec):-** Aad iyo aad ayaad u mahadsan tahay, Mudane Guddoomiye. Ilaahay ayaa mahad leh inagu soo gaadhsiiyay maalintan maanta ah.

Marka hore, anigoo ka duulaya arrinta aynu ka hadlayno ee **Xeerka Macdanta Qaranka**, waxaan xusayaa marxuum dhowr maalmood ku xanibnaa goob macdan-qodis ah, dabadeedna naftiisa ku waayay deegaan ka mid ah Jamhuuriyadda Somaliland, gaar ahaan **Melxow**. Marxuumkaasi ma helin gurmadkii uu qaranka ka mudnaa, inkasta oo ay jireen gaadiid iyo dhaqaale. Arrintaas waa in si dhab ah loola xisaabtamaa cidii masuul ka ahayd.

Mudane Guddoomiye, sida uu xildhibaan Jimcaale sheegay, xeerkan waa xeer leh muhiimad balaadhan oo quseeya qaranka iyo guud ahaan shacabka. Xoolihii dadku

lahaayeen way dhammaadeen, dadkiina maanta waxay u soo jeesteen macdanta. Marka ay dadku wax waayaanba, Ilaahay badal ayuu keenaa. Deegaanno ka mid ah Galbeedka dalka, gaar ahaan hareeraha Boorama iyo Baki, dahab ayaa bannaanka uga soo baxay, dadkuna bannaanka ayay ka urursadaan.

Maalmo dhowaan ah, meel la yidhaahdo Seemaan, oo dahabku bannaanka u soo baxay, ciidan ayaa la geeyay, inkasta oo markii dambe la soo qaaday. Wasaaradda iyo talisyada ciidankana waan u mahadnaqaynaa. Dadka xooluhu ka dhammaadeen ma habboona in laga hor-istaago dahabka iyo qadhaabka ay helayaan.

Xeerkani waxa uu ahayd in uu ka hadlo **sida loo maamulo, loo iib-geeyo loona suuq-geeyo** waxa yar ee dadku soo urursadaan. Haddii wasaaradda macdantu aanay ka shaqayn suuq-geynta, iyadoo biyaha laga saaray, lama fahmi karo shaqadeeda. Hadda waxa dhacda in wixii la helo lagu baqsado, dad shisheeyena qiime hoose kaga faa'iidaystaan. Dawladnimadu waa in ay dadkeeda u raadisaa suuq, kana dhigtaa waxa dalkooda ka soo baxaya mid qiimo leh.

Xeerkani waxa lagu sheegay "Xeerka Macdanta", mana habboona in shidaal lagu dhex daro, maadaama shidaalka iyo macdantu yihiin laba arrimood oo kala duwan. Sidaa darteed, wixii shidaal la xidhiidha waa in xeerkan laga saaraa, macdantana oo keliya loo khaas-yeelaa.

Dalka dhibaato weyn waxa ku ah in hay'ado xeer diyaarinaya ay u ekaysiiyaan "shaadh ay iyagu leeyihiin". Haddii awooddii sharci-dejinta laga leexiyo Golaha Wakiillada, xeerarka waxa lagu soo koobi doonaa dano gaar ah. Taasi dadweynaha dan uma aha.

Macdantu waa waxa dalal badan oo Afrika ah beddelay. Sidaa awgeed, haddii aynaan si taxaddar leh u gelin xeerkan, khasaare ayaynu ku dambaynaynaa. Sidaa darteed, soo-jeedintayda koowaad waa in **xeerkan si qoto dheer oo taxaddar leh loo eego**.

**Qodobka 13aad – Qaybsiga Saamiga:** Haddii xeerku aanu qeexayn sida loo qaybinayo faa'iidada u dhexaysa tuulada, degmada, gobolka iyo qaranka, xeer ma noqonayo. Ma aha in la yidhaahdo wasiir ayaa go'aan ka gaadhaya. Waxaan soo jeedinayaa in lagu caddeeyo sidan: **60% qaranka**, **40%-na gobolka, degmada iyo tuulada laga helay**, isla markaana meesha laga saaro awoodda wasiirka ee qaybsiga. Qaybinta khayraadka qaranka waxa iska leh Golaha Wakiillada.

**Qodobka 13aad, faqraddiisa 4aad:** Waxa lagu xusay laba awoodood: wasiirka iyo wasaaradda, iyada oo aan la kala caddayn. Sidaa darteed, waa in qodobkan la saxo, lana caddeeyo, ama mid laga reebo, waxaana soo jeedinayaa in **awoodda loo daayo wasaaradda**.

**Qodobka 15aad:** Meesha lagu yidhi "xeer-nidaamiye ayaa qeexi doona" waa in laga saaraa, lana beddelaa qodob si cad uu Golahan iyo sharci-yaqaannadu u qoreen, si xeerku sidaas ugu ansaxo.

**Qodobka 16aad – Dhulka ka Reeban Macdan-Qodista:** Dhulka macdantu ku jirto miyaanay markii horeba ahayn hanti qaran? Sidaa darteed, waa in si cad loo faahfaahiyaa. Ruqsadda macdan-qodista waxa lagu waayi karaa oo keliya ku xad-gudubka shuruudaha xeerkan ku xusan, lagumana waayi karo go'aan wasiir ama gole wasiirro. Sidaa darteed, soo-jeedintaydu waa in arrintaas xeerka laga saaro.

**Qodobka 17aad – Cidda laga Reebayo Ruqsadda Xuquuqda Macdaneed:**

Xuquuq macdaneed.lamasiinayo:

A. Shakhsi.
B. Qof da'diisu ka yar tahay siddeed iyo toban (18) jir
C. Qof dhaqaale ahaan caydhoobay, oo si sharci ah loo caddeeyey, ama heshiis deyn ah ku jira, iwm.
D. Qof waalan iyo qof kasta oo shuruucdu ka reebtay qaadashada ama bixinta xuquuq macdaneed shirkadeed;
E. Qof ama shirkad la xaraashay, haddii aanay xaraashidu ahayn mid qayb ka ah qorshe dib-u-qaabayn ama isku-dhafid cid kale lagula midoobay;
F. Haddii amar xaraashid ah ay maxkamad garsoor sugani ka soo saartay, laguna go'aamiyey in shirkadda albaabbada loo xidhay ama la kala diray guddigii shirkadda;
G. Qof ama shirkad la midoobay cid dayn ku lahayd.

Haddaba, marka la yidhaahdo "qof caydhoobay", yaa loola jeedaa? Ma qof shakhsi ahbaa, mise shirkad macdaneed oo kacday? Qofka caydhoobay miyaanay qarankan u bannaanayn in uu macdan qoddo si uu u hodmo? Maxaa looga reebayaa? Taasi waxay u muuqanaysaa in ruqsadaha loo bannaynayo oo keliya dadka ladan. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa **in qodobkan meesha laga saaro**.

Qofka waalan waan garanay, hase yeeshee marka la yidhaahdo "qof kasta oo xeerku ka reebay qaadashada ruqsadda", iyadoo horay loo xaddiday da'da ka yar 18 sano, waxay u muuqataa qodob si fudud loogu adeegsan karo dad aan waxba galabsan. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa **in qodobkan gabi ahaanba laga reebo, marka laga reebo qofka aan qaan-gaadhin iyo qofka waalan**.

**Qodobada 24aad iyo 25aad – Shirkadaha Macdanta / Guddida Macdanta**

Qodobka 25aad waxa uu dhigaya in guddidu ka koobnaato 5 xubnood oo wasiirku magacaabo isaga oo la tashanaya madaxweynaha, isla markaana ay yeelanayaan guddoomiye, guddoomiye ku-xigeen iyo saddex xubnood.

Waxaan soo jeedinayaa in haddii loo baahan yahay **guddi kor-joogteeya macdanta qaranka**, in xeerku si cad u qeexo **habka ay ku imanayaan**, isla markaana **Golaha Wakiillada ay ansixiyaan**, si loo hubiyo in ay yihiin dad xilkaa gudan kara. Xeer-nidaamiyaha iyo wasiirka magacaabaya waa in meesha laga saaraa.

Arrintani waa arrin **xaasaasi ah**, mana habboona in si buuxda gacanta wasaarad loogu daayo. Waa in ay noqotaa **guddi qaran**, madaxweynuhuna soo magacaabo, Golahana laga ansixiyo.

**Qodobka 64aad – Ruqsadda Sahaminta Macdanta** Hore dadku ruqsado ma qaadan jirin, iyaga ayaa gacmaha ku qodan jiray. Haddii la doonayo in macdanaha si casri ah looga faa'iideeyo, waa in **qaranku hore u sameeyaa sahaminta macdanta**, lana ogaadaa meelaha ay macdantu ku jirto.

Adduunka meel lagama bixiyo ruqsad macdan oo aan la garanayn nooca macdanta. Sidaa awgeed, ruqsadda sahamintu waa in ay ku koobnaataa **nooc macdan gaar ah**. Haddii wax kale la qaato, waa in lagula xisaabtamaa. Hadda waxa la sheegaa in macdano kala duwan si sharci-darro ah dalka looga dhoofiyo, dadkeenna daciifka ahna lagu sirto.

**Badbaadada iyo Shilalka Macdan-Qodista** Shilalka lama hortagi karo haddii godod qoto dheer la qodo iyadoo aan la hayn qalabkii badbaadada. Qalabkaas waa in uu ahaadaa mid si degdeg ah loo heli karo.

Xeerku waxa uu dhigaya in haddii shil dhaco la wargeliyo wasiirka iyo saldhigga booliska ee ugu dhow. Taasi ma aha mid ku filan. **Qodobka 105aad** waa in la beddelaa, lana dhigo in **gurmad degdeg ah laga helo meesha ugu dhow ee suurtagalka ah**.

**Qodobka 108aad – Guddida Baadhista** Xeerku ma aha mid samayn kara guddi baadhiseed, maadaama qaranku hore u leeyahay hay'ado u qaabilsan baadhista dambiyada. Sidaa awgeed, **Qodobka 108aad** waxaan soo jeedinayaa in loo daayo hay'adaha rasmiga ah ee qaranka u qaabilsan baadhista.

**Gunaanad – Md. Maxamed Abiib Yuusuf** Mudane Guddoomiye, xeerkan waxa uu u baahan yahay **sixitaan ballaadhan**. Deegaannada wax laga qodo waxa ka jira qalalaase iyo dhibaatooyin. Haddii xeerkan la ansixiyo isaga oo aan la hagaajin, mushkilado cusub ayuu dalka gelinayaa.

Markaan leeyahay "xeerkan ha la saxo", ujeeddadaydu waa in uu noqdo **xeer lagu kala bixi karo**, ee aanu noqon xeer dadka isku dira. Xeerku waa hage qaran, mana aha xeer-nidaamiye wasiir soo saaray. Waa in uu noqdaa xeer shacabka anfaca. **Waad mahadsan tahay, Mudane Guddoomiye.**

**Soo-jeedin – Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil** Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in xildhibaanku marka uu doodayo **si cad u tilmaamo qodobka uu wax ka beddelayo iyo beddelka uu doonayo**, si doodda looga faa'iidaysto. Waxaan kale oo soo jeedinayaa in mudanayaashu **akhristaan lifaaqyada xeerka**, maadaama qodobo badan oo la soo jeediyey ay hore ugu qoran yihiin lifaaqa. **Waad mahadsan tihiin.**

**Md. Barkhad Jaamac Batuun** **(20min 03sec):-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Xildhibaanada, Shaqaalaha Golaha iyo Bahda Saxaafadda, waan idin salaamayaa.

Waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horreeyey in **xeerkan si qoto dheer looga baaraan-dego**. Golahani waa Golaha Xeer-dejinta, waxaana u dhaaranay Somaliland oo dhan.

Ma habboona in Golahan loo ekaysiiyo mid **deegaanno gaar ah bartilmaameedsanaya**, sida Berbera ama Gabiley. Deegaannadaas iyo kuwa kale ee Somalilandba waxa ku jira khayraad, dadka degganna sharci ahaan xuquuq ayay ku leeyihiin.

Xeerarka aynu soo saaraysaa waa in ay noqdaan kuwo **xasillooni iyo cadaalad abuura**, kana fogaada xasarad iyo kala-qaybin bulsho. Haddii deegaan khayraad ku jiro u baahan yahay kaabayaal sida deked ama miisaaniyad, waa in Golaha la keenaa si qaranku u wada faa'iideeyo.

Anigu ma qabo in Golahani yahay gole xasad ku shaqeeya; waxaan u dhaaranay diinta, dadka iyo dalka, **Somalilandna waa in ay innagu wada sinaato**.

Anigu uma arko in xeerkan uu yahay **xeer bisayl gole gaadhay**. Anigoo ixtiraamaya Guddoomiyaha Guddida Khayraadka, waxay ahayd in guddidu aad uga sii baaraan-degto xeerkan. Marka il sharci lagu eego, xeerkan **ma aha mid dood lagu dhammeeyo lana sii daayo**, balse waxa uu u egyahay **xeer-nidaamiye wasaaradeed**.

Tusaale ahaan, hordhiciisa waxa si weyn loogu xusay **awoodda wasiirka iyo awoodda wasaaradda**, sida ay xildhibaanadii iga horreeyeyba sheegeen. Sidoo kale, xeerku gabi ahaanba kama hadlin **xuquuqda dadka deegaannada macdanta laga helay**, taas oo caqabad weyn ku ah deegaannadaas.

Sida xeerku u qoran yahay, **qof ayaa ruqsad la siinayaa**, halka sharcigu dhigayo in ruqsad la siin karo oo keliya **hay'ad leh shakhsiyad sharciyeed (legal personality)**, si waajibaad sharci ahi ugu xidhnaadaan, isla markaana haddii ay waajibaadkaas jebiyaan ay ka dhalan karto ciqaab iyo kala-noqosho ruqsad. Sidaas darteed, **qof shakhsi ah ruqsad lama siin karo**.

**Qodobka 25aad**, ee aas-aaska Guddida Heer Qaran, sida caadiga ah **guddi heer qaran ah waxa magacaaba Madaxweynaha Jamhuuriyadda**, ka dibna Golaha ayaa ansixiya. Sida xeerku hadda u qoran yahay, xataa shanta xubnood ee guddida laguma darin Guddidii Khayraadka ee kor-joogtay xeerkan.

Xeerku waxa uu xambaarsan yahay **awood aan caadi ahayn oo wasiirka la siiyay**, isla markaana waxa uu ka indho-tiray xuquuqda dadka deegaannada macdanta laga helay.

Dhaqaalaha dalku waxa uu ku tiirsan yahay **saddex qaybood oo waaweyn**:

1. Xoolaha nool (gaar ahaan Bariga),
2. Khayraadka badda,

3. Khayraadka buuraha sida dahabka iyo macdanta kale.

Haddii maanta xeerkan, oo u eg xeer-nidaamiye, lagu sii daayo rabitaan wasaaradeed, lana siiyo wasiir awood ballaadhan oo uu gudi iska magacaabo, heshiisyo caalami ahna u galo isaga oo aan lala socon, anigoo aanay xataa wax door ah ku lahayn guddidii deegaanka ee xeerkan soo diyaarisay, **waxaan u arkaa laf-jab ku imanaya qaranka iyo dowladnimada**.

Waxaynu ognahay in deegaannada Sanaag, Bariga iyo Galbeedka dalka ay horeba u jireen khilaafaad la xidhiidha macdan iyo dahab, kuwaas oo sababi kara dhiig iyo dhibaato haddii aan la helin **xeer hagi kara**.

Xeerkan iyo xeerar kale oo la mid ah waa kuwo ay bulshadu baahi weyn u qabto. Tusaale ahaan, **Xeerka Qaxoontiga** waa xeer muhiim ah maadaama dad ajaanib ah oo meelo kala duwan ka yimid ay dalka joogaan, waana masuuliyadda Golahan in uu kala xadeeyo muwaadiniinta iyo kuwa aan ahayn.

Xeerkan Macdanta ah, sida uu hadda u qoran yahay, **ma muujinayo heer dawladnimo**, balse waxa uu si weyn ugu eg yahay heer wasaaradeed. Anigu waxa aan qabaa in xeerkan ay tahay in lagu saleeyo aragti qaran oo ay ka qayb qaataan dhinacyo kala duwan.

**Soo-jeedimo – Md. Barkhad Jaamac Batuun.**

1. Xeerkan **dood uma bisla**, maadaama uu ka kooban yahay ku dhawaad **165 qodob**, badankoodna ay ku urursan yihiin wasiir iyo xeer-nidaamiye; sidaa awgeed waa in **dib loogu celiyo Guddida** si dib-u-eegis loo sameeyo.
2. Xeerku waa in uu ka hadlaa **waajibaadyo cad**, isla markaana ay ka dhalato **ciqaab sharci ah** marka la jebiyo.
3. Waa in si cad uga muuqataa **doorka dawladnimo, doorka Golaha, doorka nabad-gelyada, iyo doorka dadka iyo deegaannada macdanta laga helay**.

Haddii la yidhaahdo "xeer waa laga dooday waana la ansixiyay" iyadoo aan la saxin, taasi waxay noqonaysaa **dayacaad masuuliyadeed**. Waa in aynu dhaartii oofinaa.

Si kooban, xeerkan **waa xeer-nidaamiye**, mana laha qaabkii xeerarka aynu hore u naqaanay. Waxa kale oo aan ku soo gunaanadayaa in xeerarka si toos ah u taabanaya bulshada—sida **Xeerka Ciqaabta Guud**—ay mudan yihiin in Golaha si dhab ah uga shaqeeyo, maadaama ay jiraan qodobo ka hor imanaya Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Toosin – Guddoomiye Siciid Mire (Giire).** Mudane, waxaan jeclahay in aad doodda xeerka ku soo noqoto oo aanad ka bixin mawduuca xeerka.

**Jawaab – Barkhad:** Guddoomiye, xeerkan **xeer bisil ma aha**, waa xeer-nidaamiye; sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa **in dib loogu celiyo Guddida**.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahin (Timo-Jilic)** **(8min 35sec):-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, aad ayaan ugu mahadnaqayaa guddida hawsha qiimaha leh ee ay qabteen. Inkasta oo xildhibaano badani ka hadleen qodobbada 106aad iyo 117aad, arrimahaas badankoodu **hore ayay ugu jiraan lifaaqa guddida**, sida ay u doonayeenna waa loo habeeyey.

Waxaan taageerayaa in **Qodobka 108aad meesha laga saaro**, maadaama baadhistu tahay shaqo hay'ado qaran u gaar ah. Sidoo kale, baahiyaha iskuullada iyo arrimo kale oo la soo hadal qaaday waxay ku jiraan soo-jeedimaha guddida.

Markaan xeerka ku laabto, **Qodobka 6aad, faqraddiisa 2aad**, waxaan soo jeedinayaa in halkii lagu odhan lahaa "wasaaraddu ayaa la wareegaysa" lagu beddelo **"qaranka ayaa la wareegaya"**, maadaama arrintaasi tahay mid dastuuri ah.

**Qaybta 10.3**, waxaan soo jeedinayaa in qofka soo gudbiya warbixinta helitaanka kayd macdaneed lagu daro **abaal-marin dhan 0.1% qoondada tuulada**, si muwaadiniinta loo dhiirrigeliyo.

**Qaybta 10.4**, sida ay guddidu u dhigtay ayaan taageersanahay. Ugu dambayn, **Qodobka 12aad, faqraddiisa 1aad**, iyo **Qodobka 117aad** waa in **la is-waafajiyaa**, maadaama ay u muuqdaan kuwo is-khilaafsan.

Qodobka 13aad iyo farqadihiisa waxaan ku taageersanahay Guddida, marka laga reebo khaladaadka qoraalka (typing errors) ee ku jira, kuwaas oo loo baahan yahay in laga saaro.

Farqadda 16aad ee macdanaha kale ee laga helo meel hore loogu qodayay, iyada oo qofka ama shirkadda meesha qodayaa uu haystay ruqsad, waa in aan ruqsadda laga joojin, isla markaana aan muwaadinka shaqadiisa laga joojin, waayo haddii kale waxa ku imanaya khasaare iyo baabi'in. Macdanta dheeraadka ah ee meeshaas ka soo baxday waa in la diiwaangeliyo, muddada ruqsaddana waa in loo kordhiyaa.

Qodobka 23aad waxaan ku taageersanahay Guddida. Sidoo kale, waxaan taageersanahay dhammaan soo-jeedimihii ay mudanayaashii iga horreeyey soo bandhigeen, sidoo kale inta kale oo dhammina waxaan ku taageersanahay soo-jeedinta Guddida. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihii.

**Md. Cali Jaamac Caraale (Cali-qaran)** **(32min 03sec): -** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha Golaha, marti-sharafta inagala soo qayb-gashay Golaha iyo Saxaafadda, asc.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, mashruucan sharci ee ina horyaalla, dhammaan meelaha uu kaga qoran yahay erayga **"Wasiir"**, waxaan soo jeedin lahaa in marka la isku ururinayo soo-jeedinta Mudanayaasha iyo draft-kii hore, **meel kasta oo erayga "Wasiir"**

**ku qoran lagu beddelo "Wasaaradda."** (Qodobkaasi waxa uu helay 5 Mudane oo taageero ah – *Secondment*).

Mudanayaashana waxaan ka codsan lahaa in laygu raaco haddii loo arko mid macquul ah. Intaasina waa iga aar-raar iyo hordhac guud. Haddii aan u dhaadhaco doodayda khusaysa mashruucan sharci iyo lifaaqyada nala soo gudbiyey, waxa ay ila tahay sida soo socota:

**Qodobka 3aad, Farqaddiisa 1aad** waxa uu u dhignaa: (Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan noocyada macdanaha kala duwan ee ku jira xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland).

Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo Farqadda 1aad sidan: (Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan noocyada macdanaha kala duwan ee ku jira xuduudaha **Dalka Jamhuuriyadda Somaliland**). **Qodobka 4aad, Farqaddiisa 1aad** waxa uu u dhignaa sidan: (In lagu xaqiijiyo ilaalinta iyo horumarinta khayraadka si loogu faa'iideeyo Shacabka Somaliland).

Kalmadda *khayraad*, sida ay xildhibaanadii iga horreeyayba sheegeen ama xeerarkaba ugu jirto, waxay koobsanaysaa khayraad badan, maaddaama oo Qodobka 3aad Farqaddiisa 4aad si cad u sheegay in xeerkan lagu dabaqayo oo keliya **macdanta**, halka Qodobka 4aad Farqaddiisa 1aad lagu adeegsaday kalmadda *khayraad*, taas oo macnaheedu noqon karo khayraad aan xeerkan lagu dabaqayn, sida shidaalka iyo gaasta.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (In lagu xaqiijiyo ilaalinta iyo horumarinta khayraadka macdanta si loogu faa'iideeyo Shacabka Somaliland).

**Qodobka 4aad, Farqaddiisa 2aad** waxa uu u dhignaa sidan: (In la xaqiijiyo in qodista khayraadka macdanta loo fuliyo si waafaqsan tiknoolojiyadda munaasibka ah iyo qaab-dhaqanka wacan ee ilaalinta khayraadka iyo horumarinta khibradda qaran ee mihnadda macdan-qodista).

Waxaan soo jeedinayaa in Farqadda 2aad loo dhigo sidan: (In la xaqiijiyo in qodista khayraadka macdanta loo fuliyo si waafaqsan aqoonta casriga ah ee ku habboon, iyo hab-dhaqan wacan oo lagu ilaalinayo khayraadka macdanta laguna horumarinayo khibradda dadka ee mihnadda macdan-qodista).

**Qodobka 4aad, Farqaddiisa 3aad** waxa uu u dhignaa sidan: (In loo fuliyo sahaminta iyo qodista macdanta hab bulsho ahaan, dhaqaale ahaan iyo deegaan ahaanba waara).Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (In loo fuliyo sahaminta iyo qodista macdanta hab bulsho ahaan, dhaqaale ahaan iyo deegaan ahaanba ah mid waxtarkiisu ka badan yahay waxyeeladiisa, farsamo ahaanna lagu kalsoonaan karo).

**Qodobka 4aad, Farqaddiisa 4aad** waxa uu u dhignaa sidan:(In la maareeyo qaabka macdan-qodista, ilaalinta badqabka gudaha iyo agagaarka godad-macdaneedyada, iyo masuuliyadaha saaran ruqsadlayaasha).

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:(In lagu daba-galo qaabka macdan-qodista, ilaalinta badqabka gudaha iyo agagaarka godad-macdaneedyada, iyo masuuliyadaha saaran ruqsadlayaasha).

**Qodobka 4aad, Farqaddiisa 5aad** waxa uu u dhignaa sidan: (Si loo bixiyo qaab-hawleed isku dhafan oo nidaaminaya hawlaha sahaminta macdanta iyo qodista).

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Si loo bixiyo qaab-hawleed isku dhafan oo nidaaminaya hawlaha sahaminta macdanta iyo qodista godad-macdaneedyada).

**Qodobka 4aad, Farqaddiisa 6aad** waxa uu u dhignaa sidan: (In lagu maamulo dhammaan khayraadka macdanta ee waddanka Somaliland).

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:(In lagu maamulo dhammaan khayraadka macdanta ee Dalka Jamhuuriyadda Somaliland).

**Qodobka 4aad, Farqaddiisa 7aad** waxa uu u dhignaa sidan: (In lagu kala xadeeyo saamiyadda ay kala leeyihiin degmooyinka, gobollada iyo Dawladda Dhexe).

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (In lagu kala xadeeyo ajuurooyinka ay kala leeyihiin degmooyinka, gobollada iyo Dawladda Dhexe, sida uu dhigayo Qodobka 117aad Farqaddiisa 5aad). Halkaa waxa aan tixraac uga dhigay maaddaama oo la kala xadaynayo ajuurooyinka, qodobka 117aadna uu faahfaahinta ka bixinayo.

**Cutubka Labaad (Maamulka Macdanta)** waxa uu u dhignaa sidan: Dabaqaadda Wasiirku waxa uu si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka u gudanayaa masuuliyaddiisa shaqo, waxaana hagi doona mabaadi'da uu Dastuurku ilaaliyey. Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Wasaaraddu waxay si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka u gudanaysaa masuuliyaddeeda shaqo, waxaana hagi doona mabaadi'da uu Dastuurku jideeyey.

Sidii aan horaba u soo codsaday, halkan erayga *Wasiir* waxa lagu beddelay *Wasaaradda*. **Qodobka 6aad, Farqaddiisa 4aad**, waxaan ku soo kordhiyey farqad cusub oo noqonaysa **4.3**, kuna qoran sidan: (Qof ama shirkad lama siin karo ruqsad xidhmooyin dhul (baloogyo) badan oo isku deegaan ku yaalla, kuwaas oo ay ku jiraan macdano kala duwan, si loo ilaaliyo xaqa muwaadiniintu u leeyihiin helitaanka fursadaha macdan-qodista. Qodobkan muhiimaddiisu waa in aan shirkad keliya la siin baloogyo isku xiga ama kala durugsan oo haddana isku deegaan ah, si muwaadiniinta kale ay u helaan fursadaha macdan-qodista, isla markaana aan deegaan keliya qof loogu xidhin).

**Qodobka 6aad, Farqaddiisa 6aad** waxa uu u dhignaa sidan: (Wasiirku wuxuu u oggolaan karaa qof ama shirkad in ay muunad macdan ka qaataan goobaha ay aasaartu ku taallo, marka uu la tashado hay'adaha dawladda ee ay khusayso).

Qodobkani waxa uu xeerka ugu yaallaa in Wasiirku la tashan doono goobaha aasaarta ah marka uu cid siinayo ruqsad ay muunad macdan ka qaadanayso.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Masuuliyiinta Wasaaraddu waxay u oggolaan karaan qof ama shirkad in ay muunad macdan ka qaataan goobaha ay aasaartu ku taallo, marka ay oggolaansho ka helaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland).

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Qodobka 10aad** waxa uu tiro ahaan ku soo noqday laba jeer. Sidaa awgeed, si tirada guud ee qodobada xeerku u noqoto **156 qodob**, waa in la tirtiro mid ka mid ah labada qodob ee isku tirsiga ah, qodobkana loo beddelaa **Qodobka 11aad**.

**Qodobka 10aad (kii dambe ee la saxay laguna beddelay Qodobka 11aad, Farqaddiisa 1aad)** Waxa uu u dhignaa sidan: Cidda haysata ruqsad macdaneed waxay mudnaanta kala-doorashada shaqaalaysiinta siin doontaa xubnaha bulshada deegaanka iyo muwaadiniinta kale ee Somaliland.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:Cidda haysata ruqsad macdaneed waxay mudnaanta koowaad siin doontaa fursadaha shaqaalaysiinta dadka deegaankaas ku dhaqan.

**Qodobka 12aad, Farqaddiisa 1aad iyo 2aad** Waxa uu u dhignaa sidan: Marka ay ruqsad macdaneed tahay mid la xidhiidha hawlgal macdan-qodis, qaranku wuxuu ku yeelanayaa boqolkiiba toban (10% of mineral value). Qaranku shirkadda wuxuu ku yeelan karaa saami, haddii dhinacyadu isla oggolaadaan.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Marka ay ruqsad macdaneed tahay mid la xidhiidha hawlgal macdan-qodis, qaranku wuxuu ku yeelanayaa boqolkiiba sagaal (9% of mineral value). Qaranku shirkadda wuxuu ku yeelanayaa saami bilaa kharash ah oo lagu xanbaari doono saamiyada raasamaalka, isla markaana aanu qaranku bixinayn wax dhaqaale ah oo uu hawlaha kaga qayb qaadanayo.

Isla qodobkaas, waxaan soo jeedinayaa in lagu kordhiyo: In boqolkiiba toban (10%) la qaybiyo, iyadoo boqolkiiba sagaal (9%) la siinayo qaranka, halka boqolkiiba hadhayna la siinayo deegaanka.

**Farqadda 2aad ee Qodobka 10aad** Waxa uu u dhignaa sidan: Wasiirku wuxuu samayn doonaa xeer-nidaamiyayaal wax ka sheegaya ka-qayb-qaadashada dawladda ee hawlgallada macdan-sahaminta ama macdan-qodista ee ka dhexeeya dawladda iyo haystaha ruqsad macdaneed.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Wasaaraddu waxay samayn doontaa xeer-nidaamiye wax ka sheegaya ka-qayb-qaadashada dawladda ee hawlgallada macdan-sahaminta ama macdan-qodista ee ka dhexeeya dawladda iyo haystaha ruqsad macdaneedka, iyadoo xeer-nidaamiyahaasi aanu ka hor imanayn xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka ka jira.

Waxaan taageersanahay (Secondment-garaynayaa) soo-jeedinta Xildhibaan Maxamed Abiib ee ah in Qodobada 13aad iyo 14aad ee Cutubka 3aad, kuwaas oo isku soo noqnoqonaya kana hadlaya waajibaadka Wasiirka iyo waajibaadka Wasaaradda, la isku soo celiyo lana tirtiro kala-soocidda, Wasiirkana lagu daayo Wasaaradda, maaddaama Wasiirka iyo Wasaaraddu ay isku hal yihiin.

**Qodobka 15aad, Farqaddiisa 1aad** Waxa uu u dhignaa sidan: Wasiirku, isaga oo raacaya qodobada xeerkan, waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiyayaal, awaamiir, hagayaal iyo foomam ay u baahan yihiin hawlaha khuseeya macdanta.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:Wasaaraddu, iyada oo raacaysa qodobada xeerkan, waxay awood u leeyihiin in ay soo saarto xeer-nidaamiyayaal, awaamiir, hagayaal iyo foomam ay u baahan yihiin hawlaha khuseeya macdanta, kuwaas oo aan ka hor imanayn xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.

Waxaan qabaa in Qodobada 24aad, 25aad, 26aad, 27aad, 28aad, 29aad, 30aad iyo 31aad laga saaro xeerkan, maaddaama ay dhammaantood ka hadlayaan aasaasidda Shirkadda Macdanta Qaranka, halka Wasaaraddu ay masuul ka tahay hawlaha macdanta iyo macdan-qodista qaranka. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in gabi ahaanba laga saaro xeerka qodobadaas, anigoo rajaynaya in Mudanayaashu igu taageeraan, maaddaama qodobadani ay ka hor imanayaan xeerkan.

**Qodobka 39aad, Farqaddiisa 1aad** Waxa uu u dhignaa sidan: Ruqsadda ka-ganacsiga macdantu waa sanadle; ruqsadduna waxay dhacaysaa maalinta 31aad ee bisha 12aad (December) ee sannadka ruqsadda la soo saaray.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Ruqsadda ka-ganacsiga macdantu waa sanadle; ruqsadduna waxay dhacaysaa marka ay dhammaato muddada 12-ka bilood ah ee ka bilaabmaysa taariikhda ruqsadda la soo saaray. Sababtu waa in ruqsadaha aan wada la qaadan hal mar, qof kastana uu qaato bil gaar ah; sidaa darteed, haddii lagu saleeyo December, waxa ay dhaawacaysaa ruqsadihii la qaatay bilaha hore sida Abriil ama May, kuwaas oo aan weli muddadoodii dhammaan.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Qodobada 54aad ilaa 74aad**, kuwaas oo ka hadlaya *Ruqsadda Sahanka Hordhaca ah* iyo *Ruqsadda Sahaminta Macdanta*, dhammaantood waa qodobo aad isugu dhow oo isku mid u qoran. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in qodobadaas loo dhiibo lataliyeyaasha sharciga ee Golaha si ay u eegaan in la isku dari karo, maaddaama qoraalkoodu iyo farqadahoodu is la egyihiin, iyadoo keliya la kala beddelay magaca ruqsadda.

Waxaan la qabaa soo-jeedinta lifaaqa Qodobka 63aad sida loo beddelay Farqaddiisa 1aad. Sidoo kale, Qodobka 74aad waxa uu u qoran yahay isla qaabkaas. Sidaas awgeed, haddii lataliyeyaasha sharciga ee Goluhu soo jeediyaan in meel la isugu geeyo, waxay noqon doonaan hal qaybood halkii ay hadda laba qaybood ka ahaan lahaayeen. Haddii ay sida

ay hadda u qoran yihiin ku sii jiraan mashruucan sharci, waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 74aad loo waafajiyo soo-jeedinta lifaaqa.

**Qodobka 105aad, Farqaddiisa 1aad (Awoodda Baadhista)** Waxa uu u dhignaa sidan: Wasiirku waxa uu xaq u leeyahay in uu baadho shaqo kasta oo oggolaansho loo haysto wakhti kasta, haddii Wasaaraddu u aragto in shaqadaas loo qabtay si waxyeello u geysanaysa caafimaadka, daryeelka ama badbaadada qofka ama deegaanka.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Wasaaraddu waxay xaq u leedahay in ay baadho shaqo kasta oo oggolaansho loo haysto wakhti kasta, haddii ay u aragto in shaqadaas loo qabtay si waxyeello u geysanaysa caafimaadka bulshada ku dhaqan deegaanka, duur-joogta iyo guud ahaan deegaanka, si waafaqsan Qodobka 107aad ee xeerkan.

**Qodobka 106aad, Farqadihiisa 1.1aad, 1.2aad iyo 1.3aad (Shilalka la soo warinayo)** Waxa uu u dhignaa sidan, cidda la wargelinayo marka shil la soo sheego:

1.1 Saldhigga Booliska ee ugu dhaw, ama maamulka gobolka ama degmada uu shilku ka dhacay, ama Isuduwaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.
1.2 Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.
1.3 Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:-

1.1 Saldhigga Booliska ee ugu dhaw.
1.2 Guddoomiyaha Degmada uu shilku ka dhacay.
1.3 Guddoomiyaha Gobolka uu shilku ka dhacay.
1.4 Isuduwaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta, si uu ugu gudbiyo masuuliyiinta ka sarreeya sida Agaasimaha iyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.

**Qodobka 107aad, Farqaddiisa 2aad (Samaynta Guddiga Baadhista Shilalka)** Waxa uu u dhignaa sidan: Haddii Wasiirku ku qanco in shilkaas laga hortagi karayay haddii la qaadi lahaa tallaabooyin habboon, taxaddarna la muujin lahaa loona hoggaansami lahaa hawlaha farsamaynta macdanta, macdan-qodista, macdan-baadhista iyo sahaminta, Wasiirku wuxuu sida ugu dhakhsaha badan u magacaabayaa guddi baadhiseed oo ka kooban wax aan ka badnayn shan (5) xubnood si ay u baadhaan sababta shilkaas.

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Marka Wasaaraddu ogaato in shil khasaare sababay uu ka dhacay goobaha macdan-qodista, macdan-baadhista ama sahaminta, Wasiirku wuxuu sida ugu dhakhsaha badan u magacaabayaa guddi baadhiseed oo ka kooban shan (5) xubnood si ay u baadhaan sababta shilkaas.

Waxa aan soo jeedinayaa in lagu soo kordhiyo **Qodobka 107aad Farqaddiisa 3aad**, oo u dhiganta sidan:

Guddida shanta xubnood ahi waxay ka koobnaan doonaan:

**11.** Laba Agaasime Waaxeed oo ka tirsan Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.
**12.** Isuduwaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee gobolkaas.
**13.** La-taliyaha dhanka sharciga ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.
**14.** Mid ka mid ah odayaasha deegaanka.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Qodobka 117aad** oo tilmaamaya *Ajuuro Maamuuseedka*, sida mashruucan sharci laynoogu soo gudbiyey, dhammaan farqadaha qodobkani ka kooban yahay, Wasaaraddu waxa ay ajuurooyinka u weecisay xeer-nidaamiyeyaal, maaddaama oo xeer-nidaamiyuhu aanu takaaliif waajibin karin.

Sidaas awgeed, waxa aan soo jeedinayaa in Wasaaraddu Golaha u soo gudbiso xeer-nidaamiyeyaasha uu qodobkani sheegayo ee jidaynaya ajuurooyinka la qaadayo, si ay uga mid noqdaan xeerka.

**Qodobka 117aad Farqaddiisa 5aad**, oo tilmaamaya *Ajuuro Maamuuseedka*, marka aynu ogaano dhammaan ajuurooyinka la qaadayo sida aan hore u soo sheegay, waxa aan saxayaa Farqadda 5aad ee lifaaqa iyo mashruuca sharci ee ina horyaalla.

Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: **Qodobka 5aad – Ajuuradda (Royalty) la bixinayo** ee uu tilmaamayo Farqadda 1aad ee qodobkani waa: *(Inkasta oo qodobkan si cad aan loogu sheegin ajuurooyinka la qaadayo, haddana waxa ku xusan in xeer-nidaamiyeyaashu faahfaahinayaan).*

**5.1** Boqolkiiba toddobaatan (70%) – Dawladda Dhexe.
**5.2** Boqolkiiba shan iyo toban (15%) – Maamulka Gobolka.
**5.3** Boqolkiiba toban (10%) – Maamulka Degmada ay ka socoto macdan-qodistu.
**5.4** Boqolkiiba shan (5%) – Tuulada laga sameynayo macdan-qodista.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Qodobka 129aad Farqadihiisa 1aad ilaa 6aad**, oo ka hadlaya *Aasaaska Sanduuqa Dayactirka iyo Ilaalinta Deegaanka*:

**Farqadda 1aad** waxay u dhignayd sidan: Wasiirku waxa uu aasaasayaa sanduuqa dayactirka iyo ilaalinta deegaanka, iyada oo looga dan leeyahay ilaalinta waajibaadka deegaan ee ruqsad-layaasha macdaneed sida uu xeerku sheegayo.

Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Wasaaradda Macdanta iyo Tamartu, iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, waxay aasaasaysaa sanduuqa dayactirka iyo ilaalinta deegaanka, iyada oo looga dan leeyahay ilaalinta waajibaadka deegaan ee ruqsad-layaasha macdaneed, waxaana loo cuskanayaa xeerkan).

**Farqadda 2aad** waxay u dhignayd sidan: Wasiirku waxa uu magacaabayaa guddida dayactirka iyo ilaalinta deegaanka si gaar ah ugu hawlan hawlaha maamulidda sanduuqa.Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Wasaaradaha kala ah Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta, Wasaaradda Deegaanka, Wasaaradda Horumarinta Reer-Miyiga,

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Wasaaradda Maaliyadda ayaa soo magacaabi doona xubno ka mid noqda guddida dayactirka iyo ilaalinta deegaanka, kuwaas oo maamuli doona barnaamijka sanduuqa dayactirka iyo ilaalinta deegaanka).

**Farqadda 3aad** waxay u dhignayd sidan: Wakiillada loo magacaabay si waafaqsan Farqadda 2aad ee qodobkan waxay maamuli doonaan barnaamijka dayactirka iyo ilaalinta deegaanka ee uu wasiirku ansixiyey. Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Wakiillada loo magacaabay si waafaqsan Farqadda 2aad ee qodobkan waxay maamuli doonaan barnaamijka dayactirka iyo ilaalinta deegaanka ee ay Wasaaraddu diyaarisay, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somalilandna ansixiyey).

**Farqadda 4aad** waxay u dhignayd sidan: Ruqsad-laha kasta oo xaq macdaneed leh waxa uu ku bixinayaa qaadhaanka sanduuqa si waafaqsan qadarka qaadhaanka ee lagu ansixiyey barnaamijka dayactirka iyo ilaalinta deegaanka, muddo aan ka yarayn hal sano.

Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Ruqsad-laha kasta oo xaq macdaneed leh waxa uu ku bixinayaa qaadhaanka sanduuqa si waafaqsan qadarka ku xusan barnaamijka dayactirka iyo ilaalinta deegaanka marka uu Madaxweynaha ansixiyo, muddo aan ka yarayn hal sano).

**Farqadda 5aad** waxay u dhignayd sidan: Maamulayaasha sanduuqa waxay ilaalinayaan diiwaanka hawlaha sanduuqa, waxaana baadhitaan dhinaca xisaabaadka ah ku samaynaya shirkad madaxbannaan oo wasiirku magacaabo sannad maaliyadeed kasta.

Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Maamulayaasha sanduuqa waxay ilaalinayaan diiwaanka hawlaha sanduuqa, waxaana baadhitaan sannadle ah oo dhinaca xisaabaadka ah ku samayn doona Hanti-Dhawraha Guud, isla markaana si daah-furan ula wadaagi doona cid kasta oo ay khusayso).

**Farqadda 6aad** waxay u dhignayd sidan: Maamulayaasha sanduuqu ugu dambayn saddex bilood ka dib dhammaadka sannad maaliyadeed kasta waxay nuqulka warbixinta baadhista xisaabaadka u gudbinayaan wasiirka.

Waxa aan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: (Maamulayaasha sanduuqu ugu dambayn saddex bilood ka dib dhammaadka sannad maaliyadeed kasta, marka la helo warbixinta xisaabeed ee Farqadda 5aad, waxa lagaga go'aan qaadanayaa hab-maamulkooda iyo sida ay ugu hoggaansameen barnaamijka u degsan).

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Gunaanad ahaan**, waxa aan soo jeedinayaa in xeerkan uu dalka u leeyahay waxtar ballaadhan. Anigoo u mahadcelinaya Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah ee Golaha Wakiillada oo tacab badan gelisay, haddana waxa aan aaminsanahay in xeerkan mar kale loo saaro guddi kale ka dib doodda Mudanayaasha, iyaga oo la kaashanaya la-taliyeyaasha sharciga ee Golaha, si soo-jeedimaha Mudanayaasha iyo wixii kale ee loo arko in xeerkan muhiim u ah loogu daro,

ka dibna Golaha dib loogu soo celiyo si cod loogu qaado. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin.

**Md. C/kariim Aadan Cumar** **(23min, 18sec): -** Bismillaahi. Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, dhammaan Shaqaalaha iyo Saxaafadda, ASC. Bacda salaam, inta aanan bilaabin qodobada aan soo eegay, Mudane Guddoomiye, xeerkan waxa uu iila ekaaday mid laga keenay nidaam xoogaa u janjeedha *authoritarian*, ama xukuumaddu awood badan leedahay, halka xuquuqda shacabka ay u muuqato in la yaraystay. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa, anigoo la qabta xildhibaanadii iga horreeyay, in halkii *Wasiir* laga dhigi lahaa *Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta*, isla markaana si dhab ah loo tixgeliyo xuquuqda gaarka ah ee muwaadiniinta, si xeerku u noqdo mid mudnaan siinaya ilaalinta xuquuqda iyo wanaagga nolosha shacabka Jamhuuriyadda Somaliland.

Meelo badan oo ka mid ah mashruucan sharci waxa ku jira **kalmado Af-Ingiriisi ah** oo la isticmaalay, kuwaas oo **aan loo samayn turjumaad rasmi ah oo Af-Soomaali ah**. Arrintaas waxa aan soo jeedinayaa in **aad iyo aad looga fiirsado**, lana siiyo **macne Af-Soomaali ah oo ay dadku si fudud u fahmi karaan**.

Tusaale ahaan, kalmadda **"dimension stone"** oo lagu isticmaalay **bogga 7aad**, waxa lagu sharraxay in loola jeedo dhagax kasta sida marmar oo loo soo saaro **isticmaal qurxin** iwm, balse **aan loogu talo-gelin dhisme ama wax lagu dhiso**. Sidaas awgeed, waxa ka habboon in loo bixiyo kalmad Af-Soomaali ah oo kooban, sida **"dhagaxaanta lagu qurxiyo dhismayaasha"**, halkii lagu sii adeegsan lahaa kalmad shisheeye.

Bogga **13aad**, waxa jira kalmado **nuxurkoodu guud ahaan isku mid yahay**, sida:– oggolaanshaha ganacsiga macdanta,– oggolaansho macdaneed,– oggolaanshaha macdan-qodista ee qadiimiga ah,– oggolaansho kayd ganacsi.

Waxa aan filayaa in dhammaantood **lagu soo koobi karo hal eray**, sida **"Ruqsad ama Oggolaansho Macdan-qodiseed"**, taas oo markaa wada huwan karta **soo-saarka, suuq-geynta iyo iibinta**, si hal qodob oo keliya loogu maareeyo.

Isla **bogga 13aad**, xagga hoose, waxa ku qoran **"macdan-qodiseed"**, waxaana loola jeedaa **barnaamij loogu talo-galay hawsha macdan-qodista**, kaas oo qofka dalbanaya ruqsadda macdan-qodista uu soo diyaarinayo, Wasiirkuna uu ansixinayo marka ruqsadda la bixinayo ama la cusboonaysiinayo. Waxa ay ila tahay in **qodobkan laftiisa meesha laga saari karo**, maadaama ay **qodobada horeba buuxinayaan**.

Bogga **14aad**, eray-bixin ahaan, waxa mar kale ku qoran **"ruqsad"** iyo **"ruqsad macdaneed"**, halka ay horeba ugu soo noqnoqdeen xeerka. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **la mideeyo**, lana yidhaahdo **"ruqsad wax-soo-saar ama macdan-qodiseed"** oo keliya, isla markaana laga boodo soo-noqnoqoshada.

Isla bogga **14aad**, kalmadda **"Sahamin"** waxa lagu sharraxay sahaminta iyo baadhista macdanta, dhulka iyo *kayd*. Af-Soomaaliga, *kayd* badanaa waxa loola jeedaa wax la

kaydiyey ama meel lagu kaydiyo, halka macdantu tahay wax Ilaahay ku abuuray dhulka gudihiisa. Sidaas awgeed, waxa ku habboon in lagu beddelo **"macdanta ku qarsoon dhulka"** ama **"macdanta ku jirta dhulka"**, isla markaana lagu daro in sahanku ku dhacayo **habab qodiseed oo aan waxyeello u geysanayn nafta bini-aadamka iyo deegaanka midna**.

Bogga **15aad**, waxa ku qoran **"warbixin geology"**, taas oo ah kalmad ay fahmi karaan oo keliya dadka aqoonta u leh cilmiga dhulka. Sidaas awgeed, waxa habboon in lagu beddelo **"warbixin ku saabsan cilmiga dhulka iyo khayraadka ku jira"**, si ay u noqoto mid dadweynaha u fudud.

Bogga **16aad**, kalmadda **"xeer-nidaamiye"** waxa loola jeedaa xeer kasta oo ka farcama xeerkan, hase yeeshee waxa jira dad badan – xitaa kuwo wax bartay – oo aan fahmin waxa xeer-nidaamiye yahay. Sidaas awgeed, waxa aan soo jeedinayaa in **kalmaddan si cad loo macneeyo**, lana siiyo **macnaha saxda ah ee sharciyeed** sida uu dhigayo nidaamka sharciga Jamhuuriyadda Somaliland.

Sidoo kale, waxa ku qoran **"xuquuqda macdanta – ruqsado dib-u-dhigasho"**, inkasta oo laga yaabo in meelaha dambe lagu sharxo, haddana waxa aan soo jeedinayaa in **halkan lafteeda lagu qeexo**, si dadku u fahmaan waxa loola jeedo *ruqsad dib-u-dhigasho*.

**Qodobka 3aad**, waxa uu sheegayaa in xeerkan lagu dabaqayo dhammaan macdanaha ku jira *xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland*. Maaddaama *xuduud* badanaa loola jeedo koonayaasha dalka, waxa aan soo jeedinayaa in lagu beddelo **"dhulka ku jira gudaha Jamhuuriyadda Somaliland"**, si macnuhu u noqdo mid cad.

Qodobka 3aad **Farqaddiisa 5aad**, farqadaha qodobkan waxa lagu qoray **farta Laatiinka**, sidaas awgeed waxa aan soo jeedinayaa in **loo beddelo lambarro caadi ah**. Farqaddan waxa kale oo ay sheegaysaa in xeerkan aan lagu dabaqayn shidaalka iyo gaasta dabiiciga ah; waxa aan ku dari lahaa **dhuxul-dhagaxeedda iyo tamarta korontada**, maadaama ay dhammaantood hoos yimaaddaan Wasaaradda.

**Qodobka 4aad Farqaddiisa 3aad**, kalmadda *"waaraya"* waxa ay u muuqataa turjumaad toos ah oo laga keenay *sustainability*. Af-Soomaali ahaan macnaheedu si fudud looma fahmi karo, sidaas awgeed waxa ka habboon in lagu beddelo **"aan waxyeello u geysanayn bulshada, dhaqaalaha iyo deegaanka"**.

**Cutubka Labaad – Maamulka Macdanta**, waxa ku jira khaladaad erey-bixin ah sida *"dabaqaadda"*, sidoo kalena *Wasiir* ayaa si badan u soo noqnoqda. Waxa aan soo jeedinayaa in khaladaadkaas la saxo, **Wasiirkana lagu beddelo Wasaaradda**.

**Qodobka 5aad – Lahaanshaha Macdanta**, inkasta oo lagu sheegay in macdan kasta oo laga helo dhulka Somaliland ay tahay hanti dawladeed, haddana waxa aan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horreeyay ee soo jeediyey in la yidhaahdo **waa hanti ay leeyihiin shacabka Somaliland**, maadaama dawladdu tahay mid shacabku soo doorteen. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in lagu daro farqad odhanaysa **dawladda khasab kuma faragelin**

**karto dhul ama hanti ma-guurto ah oo ay leeyihiin dad gaar ah ama shirkado sharci ahaan u hantiyey**, haddii aan ruqsad sharci ah laga helin.

Isla **Qodobka 5aad Farqaddiisa 9aad**, kalmadda **"strategic"** iyo **"radio-active"** waa kalmado Af-Ingiriisi ah oo dad badani aanay fahmin. Sidaas awgeed, waxa aan soo jeedinayaa in halkan lagu qeexo lana yidhaahdo: **macdano leh saamayn ballaadhan oo togan ama taban ku yeelan kara dhaqaalaha dalka, nolosha bulshada iyo deegaanka**, isla markaana leh **curiyayaal shucaac sii daaya (kaah-ful)**, kuwaas oo waxyeello u geysan kara jidhka bini-aadamka iyo noolaha.

**Qodobka 7aad Farqaddiisa 1.1**, xuquuqda sahanka hordhaca ah (*non-exclusive right*) si cad looma qeexin. Waa in la cadeeyo **cidda sahaminaysa, muddada heshiiska, nooca heshiiska, ajuurooyinka la qaadayo, iyo in xuquuq wax-soo-saar aanay ku jirin**.

**Qodobka 8aad Farqaddiisa 1.3**, waxa aan soo jeedinayaa in lagu daro farqad ka horreysa oo ka hadlaysa **dhul gaar loo leeyahay**, ha noqdo qof, shirkad ama hay'ad sharci ah, isla markaana la xaqiijiyo in **dawladda aanay ku xadgudbi karin xuquuq gaar ah** iyada oo aan oggolaansho sharci ah laga helin.

**Qodobka 9aad** Masuul kasta oo laga codsado inuu bixiyo dhul ay hay'ad dawli ahi leedahay si looga baadho macdan waa inuu **muddo 30 maalmood gudahood** ku bixiyaa **oggolaansho ama diidmo**. Halkan waxaad ka arkaysaa in meelaha ay dawladdu leedahay **aan la khasbi karin**, balse sharcigani waxa uu jidaynayaa in meel uu **qof shaqsi ahi leeyahay** ay dawladdu tidhaahdo *qaranku wuu u baahan yahay*, isla markaana **si toos ah (automatic)** looga qaadi karo. Arrintaasi waa arrin **ka soo horjeedda xuquuqda gaarka ah (private)** iyo **xuquuqda madaniga ah** ee dadka waddankan leeyihiin.

Sidaas awgeed, waxaan ku dari lahaa **Farqad 2aad** oo odhanaysa: "Qof kasta, shirkad kasta ama cid kasta oo qaanuuni ah oo leh dhul gaar ah (mid madani ah), haddii ay dawladdu u baahato in macdan laga baadho ama la faro-galiyo, waa inay waydiisataa oggolaansho qofkaas, shirkaddaas ama iskaashatadaas."

Sidoo kale: "Qofkaas, shirkaddaas ama iskaashatadaas waa inay kaga soo jawaabaan **muddo 60 cisho gudahood**, iyaga oo diidaya ama oggolaanaya. Haddii aanu ka soo jawaabin muddadaas, waa in loo qaataa **in aanu oggolayn**, mana bannaana in wax faro-gelin ah lagu sameeyo."

**Qodobka 10aad – Kala mudnaan siinta shaqaalaynta** Waxaad mooddaa in sharcigani siinayo Wasiirka awood uu shaqaalaha **kala mudnaan siiyo**. Waxaan soo jeedinayaa in dhammaan wixii shaqaale la xidhiidha **loo wareejiyo Hay'adda Shaqaalaha Madaniga ah**, maaddaama ay tahay hay'adda masuulka ka ah xuquuqda shaqaalaha.

Waxaan ku dari lahaa **Farqad 2.4** oo odhanaysa: "Waxa waajib ku ah loo-shaqeeyaha inuu xaqiijiyo **fayo-qabka iyo nabadgelyada** shaqaalaha u shaqaynaya, iyo cid kasta oo soo booqanaysa ama imanaysa goobta ay hawshu ka socoto."

Maaddaama mihnadda **macdan-qodistu** ay tahay mihnad **aad u khatar badan**, waa inay jiraan habab lagu badbaadinayo **nolosha bini-aadamka** iyo **deegaanka**, taas oo ay Wasaaraddu si buuxda masuuliyaddeeda u qaadato inay si dhab ah u hubiso.

**Qodobka 11aad – Farqadda C** Waxaan ku dari lahaa **Farqad D** oo odhanaysa: "Haddii ay adeegsanayaan shaqaale ajaanib ah ama qalab dibadda laga keenayo, dadka la siiyay ruqsaddu xaq ayay u leeyihiin, balse waa inay cadeeyaan in arrintaasi dan u tahay **shirkadda, macaashkeeda iyo horumarkeeda**, isla markaana aanay ka hor imanayn **shuruucda dalka**, isla markaana aanay wax dhibaato ah ku ahayn **horumarka bulshada, dhaqaalaha iyo deegaanka**."

**Qodobka 16aad – Dhulka ka reeban macdan-qodista** Qodobkani waxa uu la mid yahay qodob hore. **Farqadda 1aad**, erayga *Wasiir* waa in lagu beddelaa *Wasaarad*. Waxa loo dhigi karaa sidan: "Wasaaraddu waxay dhul ka dhigi kartaa mid ka reeban in macdan laga eego ama laga sahamiyo marka ay dhacdo in dhul ruqsad haystay, qayb ahaan ama gabi ahaanba, loogu baahdo **ujeeddo qaran**."

Hase yeeshee, *ujeeddo qaran* waa eray **aan caddayn**, waana kalmad ay adeegsadaan dawladaha *authoritarian*-ka ah ee ku xadgudba xuquuqda shacabka. Sidaas awgeed, waa inay **si cad u qeexnaataa**, isla markaana loo maraa **dariiq sharci ah** oo caddeynaya xuquuqda lahaanshaha qofka muwaadinka ah ama deggenaha dalka ee madaniga ah.

**Qodobka 17aad – Cidda laga reebay ruqsadda xuquuq macdaneed** Halkan waxa lagu sheegay **18 jir**, halka shuruucdeennu hore u tilmaamayaan **15 jir**. Waa in la waafajiyaa shuruucda jira. Marka laga hadlayo shaqsi, waa inuu noqdaa **18 jir ama ka weyn**, isla markaana **maskax ahaan caafimaad qaba**. Erayga *waalan* waa in laga saaraa, maaddaama aanu ahayn eray habboon.

Arrimaha la xidhiidha **shirkad kacday ama caydhoobay**, dalkeenna ma jiro sharci si cad u qeexaya *insolvent*. Sidaas awgeed, qodobkan waa in laga saaraa marka laga hadlayo shaqsi, shirkaddana loogu sameeyaa **qodob gaar ah**. Qodobada la xidhiidha **xaraashka** iyo wixii la mid ah waa in lagu koobo shirkadaha, lagana saaro shaqsiga, shaqsigana lagu soo koobo labadaa shuruudood oo keliya.

**Cutubka 4aad – Qodobka 32aad, Farqadda 1aad** Halkan Wasiirka ama Wasaaraddu waa la xusay. Waxa ku qoran in haddii maalgelinta mashruucu ka badan tahay **200 milyan**, Wasiirku heshiis macdaneed la geli karo. Su'aashu waxay tahay: *haddii ay ka yar tahay 200 milyan, maxaa dhacaya?*

Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan: Haddii maalgelintu ka yar tahay **200 milyan**, Wasiirku awood u yeesho inuu si toos ah u galo heshiis macdaneed, marka uu hubiyo in uu waafaqsan yahay **Dastuurka, xeerka maalgashiga, xeerarka maaliyadda iyo dhammaan shuruucda dalka**, iyada oo **aan loo baahnayn** in loo gudbiyo Golayaasha Baarlamaanka.

Sidoo kale, meelo ka mid ah qodobkan waxa loo baahan yahay **in lambarrada la waafajiyo**, gaar ahaan **bogga 28aad**. **Farqadda 5aad**, oo sheegaysa in dhammaan heshiisyada macdaneed loo gudbinayo Golaha Wasiirrada, waxay khilaafaysaa qodobkii hore. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in: "Dhammaan heshiisyada macdaneed ee qiimahoodu ka badan yahay **200 milyan**, ama leh dabeecad **strategic**, loo gudbiyo Golayaasha Baarlamaanka si oggolaansho looga helo."

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, halkaas ayaan ku joojinayaa, maaddaama Mudanayaal badan ay doonayaan inay ka doodaan. Waxaan hal fikrad oo gunaanad ah soo jeedinayaa: Waxaan aad ugu mahadcelinayaa dadkii ka soo shaqeeyey mashruucan, gaar ahaan **Guddida Macdanta iyo Khayraadka Dabiiciga ah**, oo shaqadii koowaad meel wanaagsan soo gaadhsiiyey.

Waxaan soo jeedinayaa, Mudane Guddoomiye, in xeerkan la siiyo **wakhti dheeraad ah**, isla markaana **afar-ta line** ee Goluhu u kala qaybiyaan **80-ka bog** ee mashruucu ka kooban yahay, line walbana la siiyo **20 bog** si ay si qoto dheer u dersaan, ka dibna cod loo qaado, inshaa'Allaah. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** (8min, 14sec):- Shir-guddoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Saxaafaddaba waan salaamayaa, ASC. Macdanta iyo Tamartu waa laba eray oo labadooduba waaweyn yihiin oo isa saaran. Marka tamar la yidhaahdo, waxa loola jeedaa shidaalka iyo wixii kale ee hoos yimaadda; macdantuna, sida aynu wada ognahay, waa wixii la qodo ama dhulka korkiisa laga helo. Marka la isu geeyo, waa **khayraadka dabiiciga ah (natural resources)** ee Ilaahay dalka ku manaystay.

Rag badan baa ka soo shaqeeyey guddidii loo xil saaray, inta badanna wax weyn bay ka beddeleen, aad iyo aad ayaanan ugu mahadcelinayaa. Waxay keeneen meel wax laga bilaabi karo, waana muhiim in marka hore lagu dhiirado bilow, ka dibna la sii horumariyo.

Waxaan filayaa in meel wanaagsan oo laga bilaabi karo ay tahay **macdanta iyo tamarta**, maaddaama ay aad muhiim inoogu yihiin wakhtigan aynu joogno. Sida la ogyahay, gobollo badan baa macdan-qodis ka socotaa, macdantuna way kala duwan tahay, qaybo badanna way leedahay. Dawladdu Wasaarad bay u xil saartay, Wasaaradduna waa inay aad ugu dadaashaa **nidaaminta dadka isku dayaya macdan-qodista**; qaar wakhti badan ku lumiyey, qaar wax ka faa'iiday, qaar kalena jidka ku haray.

Macdantu waa kala qiimo badan tahay; qaar waxay u baahan yihiin qodid iyo hawlo badan, qaar kalena Ilaahay baa si fudud u siiya, dad badanna waxay uga dhigtaan shaqo, wixii Ilaahay siiyana way ka faa'iidaystaan.

Aragtida guud waan soo dhawaynayaa sidii xildhibaanadii iga horreeyey u dhigeen, gaar ahaan meelaha ay u saxeen ee u baahnaa in la seket-gareeyo, sida in meelaha Wasiirka lagu qoray lagu beddelo Wasaaradda, lana helo kala qaybsanaan hawleed, isku-duubni iyo in aan awoodda oo dhan la siin Wasiirka. Waxa kale oo aan soo dhawaynayaa wixii ay

xildhibaanadii iga horreeyey saxeen, magac-bixiyeen ama ay u habeeyeen sida ay xeerarku isugu hagaagsan yihiin.

Kolay, wakhtigan aynu ku jirno dunidu dhaqaale ahaan aad bay isu beddeshay; waddan walbana waxa uu ku hawlan yahay wixii uu haysto, ha noqoto xoolo ama macdan, si uu uga faa'iidaysto, dadkiisa, dalkiisa iyo noloshiisaba ugu badbaadiyo. Sidaas awgeed, waxa loo baahan yahay xil weyn iyo hagar-la'aan in lagu mideeyo dhammaan kuwa hadda ku hawlan hawlahan, ha ahaadeen kuwo ruqsado la siiyey ama hawsha ku jira, si loo fududeeyo shaqadooda. Kuwa aan weli u diyaarsanayn ama nidaamku ka yara khaldan yahayna waa in loo saxo, laguna dhiirrado ilaalinta ruqsadaha, xuquuqaha iyo sharciyadda. Dawladda iyo Wasaaradda Macdantuna waa inay si wanaagsan u habeeyaan sidii sahamin aqooneed iyo fududayn loogu samayn lahaa, si loo helo xog cad oo muujinaysa waxa meesha ku jira, waxa faa'iido leh iyo waxa ka soo baxaya. Ka hor inta aan dadka loo oggolaan in ay hawsha galaan, waa inay dawladdu, maaddaama ay tahay hanti ummadeed, samayso sahamin, sugto waxa meesha ku jira, ka dibna ruqsadaha ku bixiso shirkadaha awoodda u leh maamulidda iyo wax-soo-saarka, si looga ilaaliyo shirkado aan waxba soo saari karin ama aan meel gaadhi karin.

Sidaas marka loo habeeyo, intii aan waxba la soo saarin ee la diyaariyey lana kala qeexay, qofka hawsha leh waxa uu leeyahay saamigiisa, qofka shaqeeya waxa uu leeyahay xuquuqdiisa, deegaanka ay hawshu ka socotana waxa uu helayaa horumar iyo adeeg bulsho. Wixii dhibaato ah ee ka dhasha, ha noqoto deegaan, dad ama duunyo, xuquuqda ka dhalata waa in iyadana meel cad loo dhigaa. Intaas oo dhan waa inay noqdaan kuwo nidaamsan, mid walbana yeesho nidaamkiisa, iyaga oo is-kaashanaya, laguna kormeero si joogto ah. Marka horena waa in lagu dhiirrado oo la fududeeyo, marka dambena waa in la ilaaliyo lana xakameeyo, haddii Alle idmo.

Waxaan isleeyahay marka intaas oo dhan is-waafaqaan oo isla jaan-qaadaan, waxa ay dhiirri-gelinaysaa in aynu si kalsooni leh u galno macdanta iyo tamarta labadaba. Tamartu se waa hawl u baahan shirkado waaweyn iyo nidaamyo waaweyn, mana aha mid ay geli karaan shirkado yaryar ama dad isku day ah. Sida aynu la soconno, dhawaan ayay bilaaban kartaa, dalkeennuna qayb ayuu ka noqon karaa, gobollo qaarkoodna laga bilaabi karaa qorshaha dhow ee inagu soo fool leh. Sidaas darteed, ka hor inta aan la gelin, waa in nidaamkii iyo deegaanka loo qorsheeyey lala galaa wacyigelin wanaagsan iyo gogol-xaadhis cad, si aan mustaqbalka khilaaf iyo iska-hor-imaad hadal keeni karin u imanin.

Waxaan aad iyo aad u dhiirri-gelinayaa in lagu dhiirrado in wixii khayraad ah ee dalka ku jira aynu noqono kuwii ugu horreeyey ee fududeeya oo dhiirrigeliya, halkii aynu mar walba noqon lahayn gole hakad gelinaya hawl muddo bilo ama sannado ah. Waa sax in laga baaraan-dego, balse sidoo kale waa in dadaal badan la geliyo wakhtiga aynu haysanno, in si qoto dheer loo akhriyo, go'aamada looga qaybqaato, wixii aynu u aragno inay leex-leexsan yihiinna si aqoon leh loo saxo. Sidaas awgeed, maalmaha soo socda aynu

si aad ah u dadaalno, codayntana aynu dedejino. Khayr baan idiin rajaynayaa, intaas ayaan ku soo gunaanadayaa.

Mudane Guddoomiye, waxaan anigu ka bilaabayaa arrinta inoogu muhiimsanayd, taas oo ah in xeer kasta oo Golahan soo mara loo maro Guddida Shuruucda iyo Arrimaha Diinta, si looga eego wixii shareecada ka hor imanaya. Kolay, xeerkani waxa jira dad u arka in xeerarka qaarkood aanay u baahnayn in shareecada laga eego, balse xeer kasta oo ina soo mara shareecada wuu u baahan yahay. Tusaale ahaan, xeerkan macdanta, macdantu waa hanti ummadeed oo laga soo saarayo dhulka hoostiisa. Wax kasta oo la soo saaro, shareecadu wax bay ka sheegtay. Marka dalag beereed la goosto, sako baa ku waajiba.

Macdanta, marka aan la iibin, marka ay iib gasho ama la kaydiyo, sakadeedu waa waajib. Laakiin marka la soo saaro ka hor iibka, waxa jira waxyaabo shareeco ahaan waajib noqon kara oo ummadu ku yeelanayso xuquuq. Sidaas awgeed, xeerkan waxa loo baahan yahay in shareecada loo gudbiyo, lana sameeyo baadhitaan caddeynaya in sako ku waajibayso iyo in kale, iyo sida loo kala saarayo. Taasi waa tusaale, xeer walbana sidaas ayaa loo baadhaa.

Waxaan aad u taageerayaa guddidan xeerkan ka soo shaqaysay; runtii dadaal weyn bay muujiyeen. Xeerku Af-Soomaali ayuu u badnaa, soo-noqnoqoshona aad bay u yareeyeen, habayn wanaagsanna way ku sameeyeen. Qodobka inta badan soo noqnoqday ee wax walba Wasiirka lagu ururiyey, waxaan u arkaa in dib loogu noqdo, lana yidhaahdo wixii wasaaradeed Wasaaradda ha noqoto, wixii awood Wasiirna Wasiirka ha loo daayo. Codsiyada ruqsadaha, tusaale ahaan, waa inay maraan waaxaha Wasaaradda, Agaasimaha Guud, ugu dambayntiina Wasiirku ha noqdo saxeexa u dambeeya, si loo helo hufnaan iyo nidaam shaqaynaya.

Arrinta royalty-ga, guddidu si fiican bay u habeeyeen marka loo eego qaabkii hore. Meesha ugu nugul ee dhibaatadu ka dhici karto waa tuulada, maaddaama culayska ugu badan halkaas ku dhaco, waana goobta macdanta laga soo saarayo. Waxaa dhici karta in dad badani ka barakacaan goobtaas, xoolo iyo nololba ay ka guuraan. Sidaas awgeed, halkii la odhan lahaa dawladdu mar dambe ha u raadiso kaalmo, waxa ka habboon in marka hore royalty-ga lagu daro qayb u gaar ah tuulada, si barakaca, adeegyada bulshada iyo dhibaatooyinka tooska ah wax looga qabto. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in boqolkiiba tuulada loo qoondeeyey, oo ahaa 10%, waxoogaa la kordhiyo.

Waxaan soo jeedinayaa in **boqolkiiba 10%**-kaa laga dhigo **boqolkiiba 20%**, oo **tuulada** loogu talo-galo, lagana soo jaro ta u sarraysa ee **boqolkiiba 65%** ah ee loogu talo-galay **gobolka**. Sababta oo ah ta gobolku inta badan waa **miisaaniyad dawladeed** oo ku dhacda, halka **culayska ugu badan** uu si toos ah ugu dhaco **tuulada iyo degmada**. Sidaas awgeed, **degmada iyo tuuladu** waa in culayska miisaaniyadeed lagu saaraa **lacagta royalty-ga** ee halkaas ka soo baxda, si ay ugu daboolaan **baahiyaha ka imanaya macdan-qodista**. **Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin.**

**Md. Eng. Xirsi C/laahi Xirsi** (14min, 13sec):- **Bismillaahi**, mahadsanid **Mudane Guddoomiye**. Doodda **Xeerka Macdanta** waxaan ka yara horreysiinayaa hordhac ku saabsan arrin dhowaan ka dhex muuqatay **baraha bulshada (social media)**, taas oo ah heshiis ay **dawladda Soomaaliya** la gashay shirkad la yidhaahdo **Coastal Expeditions**, taas oo sheegtay in ay bixisay **$7 milyan (toddoba milyan doollar)** si ay baadhitaan uga bilowdo Soomaaliya.

Waxaan si cad **uga digaynaa dawladda Soomaaliya** in **Somaliland** aanay ku jirin heshiisyada ay la galayaan cid kasta oo ay doonaan. **Shirkaddaasna digniin weyn** ayaannu u diraynaa in ay iska hubiso heshiiskaas haddii ay ku jiraan **meelo Somaliland ka mid ah**, wixii laga qaatayna ay ka khasaartay. **Somaliland waa dal madax-bannaan**, wax shuqul ahna kuma lihin.

**Mudanayaal**, in aynu **xeerkan ansixino** iyo xeerarka kale ee la midka ah sida **Xeerka Shidaalka** iyo **Xeerarka Maalgashiga** waxay Somaliland ka dhigayaan dal la tartami kara **dalalka Geeska Afrika**. Sidaas awgeed, waxaan ku adkaynayaa in marka aynu **xeerkan sax-tirno** aynu **si degdeg ah u ansixino**, si aan dalkeenna uga harin **tartanka weyn ee maal-gelinta caalamiga ah**.

Markaan u soo noqdo **qodobada xeerkan**, kalmadda ugu badan ee ku soo noqnoqonaysa waa **"Wasiir"**, waxaana aan isku dayay inaan tiriyo, waxay ka badan tahay **boqol jeer**. Sida ay **xildhibaanadii iga horreeyey** sheegeen, wax macno ah ma samaynayso in **Wasiirka** si gaar ah loo siiyo awoodo ka baxsan **Wasaaradda**, maaddaama uu yahay madaxii Wasaaradda. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in **Wasiirka meesha laga tirtiro**, lana daayo **Wasaaradda**, maxaa yeelay wixii ay wasaaraddu leedahay, wasiirkuna wuu leeyahay.

**Qodobka 4aad (Ujeeddooyinka Xeerka)** waxaan ku daray **farqad cusub** oo odhanaysa: **"Ilaalinta badqabka deegaanka iyo hubinta badqabka dadka ku dhow godadka macdanta laga qodayo iyo shaqaalaha ka shaqaynaya."** Arrintani waa mid aad muhiim u ah, maaddaama marar badan la arko **godad macdan** oo furan oo la iskaga tago, xooluhuna ay ku dhacaan, dadkuna ay ku dhaawacmaan, gaar ahaan habeenkii. Sidaas awgeed, shirkadaha waa in lagu waajibiyo in ay **goddada aasan** oo ay qaadaan **mas'uuliyadda wixii waxyeello ah** ee ka dhasha.

**Qodobka 6aad, Farqaddiisa 4aad**, waxaan **secondment-garaynayaa Xildhibaan Cali Qaran**, kaas oo soo jeediyay qodob aad muhiim u ah, kaas oo ah in **aan hal shirkad keliya** loo oggolaan in ay degmo ama gobol ku haysato **baloogyo fara badan**, balse fursadda loo daayo **shirkado kale**, si loo helo **cadaalad iyo tartan furan**.

**Qodobka 13aad iyo Qodobka 14aad** waxaad mooddaa inay nuxur ahaan isku mid yihiin; midna waxa uu ka hadlayaa **awoodda Wasaaradda**, midna **awoodda Wasiirka**. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 14aad gabi ahaanba meesha laga saaro**,

maaddaama Wasiirku uu ka tirsan yahay Wasaaradda oo aanu awood gaar ah oo ka baxsan lahayn.

**Qodobka 17aad**, sida ay sheegeen xildhibaano hore, waa in **xeerarka la mariyaa guddida shareecada**. Da'da **18 jir** ee halkan ku qoran waa in loo beddelaa **15 jir**, maaddaama **diinta Islaamku** qofka ku qaangaadhsiiso da'daas, haddii calaamadaha qaangaadhnimadu muuqdaan.

**Qodobka 25aad**, oo ka hadlaya **Aasaaska Shirkadda Macdanaha Qaranka**, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"Hay'adda Macdan-Qodista Qaranka"**, lagana saaro erayga **shirkad**, maaddaama shirkaddu inta badan tahay mid **gaar loo leeyahay**. Sidoo kale, **guddida maamulka** waa in uu magacaabaa **Madaxweynaha**, tiradana laga dhigo **7 xubnood**, halkii Wasiir magacaabi lahaa.

**Qodobka 26aad**, dhammaan meelaha uu **Wasiirku** ku xusan yahay waa in laga saaraa, hay'aduna noqotaa **mid madax-bannaan**. **Qodobka 32aad, Farqaddiisa 5aad**, waxaan ku raacsanahay sida **guddidu u beddeshay**, maaddaama ay caddeynayso in **dhammaan heshiisyada macdaneed** ay ansixinayaan **Golaha Wakiillada**, mana jiro heshiis uu **Wasiir** ama **Golaha Wasiirradu** si gaar ah u ansixinayaan.

**Qodobka 33aad** isaguna waa inuu meesha ka baxaa, maaddaama uu khilaafayo qodobkaas hore. **Qodobka 40aad, Farqaddiisa 1aad**, waxaan ka saaray **Farqadda 1.2.2**, oo ku saabsan **qiimaha la iibsaday ama la iibiyey macdanta**, maaddaama ay tahay **sir ganacsi** oo gaar u ah shirkadda, loona baahnayn in loo gudbiyo Wasaaradda.

Sidoo kale, waxaan ka saaray **Farqadda 1aad (1.2.4)**, oo odhanaysay *"magaca iyo ciwaanka iibiyaha ama iibsadaha ama qofka macdanta loo diray"*. Mar labaad, arrintaasi waa arrin sir ah, maadaama qofka loo diray macdanta iyo qofka ka iibiyayba ay isugu gaar tahay, waana sir ganacsi. Qof walbaana waa inuu dadaal u galaa sidii uu u heli lahaa suuq-gayn. Sidaas darteed, in lagu qasbo inuu sirtiisa ganacsi bixiyo macno badan samaynayso. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **labadaas farqadood** laga saaro qodobka.

**Qodobka 52aad Farqaddiisa 3aad**, oo ka hadlaya xuquuqda haysashada ogolaanshaha macdan-qodista qadiimiga ah, waxa uu farqaddaasi sheegay in shaqaalaha ka shaqaynaya balooggu aanay ka badnaan karin 12 qof. Hase yeeshee, **Qodobka 53aad** waxa lagu sheegay in balooggu yahay **16km²**, taas oo aanay suurtagal ahayn in 12 qof oo kaliya ka shaqeeyaan. Sidaas darteed, waxaan ka saaray tiradaas 12 qof ah, maadaama shirkaddu ay xaq u leedahay inay shaqaaleysiiso tirada ay u baahato.

**Qodobka 86aad Farqaddiisa 3aad**, oo ku saabsan shuruudaha macdan-qodista, waxa uu tilmaamay in Wasiirku ka dhaafi karo shirkadaha qaar bixinta **10% royalty-ga**, iyadoo la eegayo duruufo. Arrintaas waan ka saaray, maadaama Wasiirku aanu awood u lahayn inuu cidna ka dhaafo royalty-ga ay Xukuumadda Somaliland ku leedahay macdanta, waayo waa **hanti qaran** oo ummadda oo dhan ka dhaxayso. Sidaa awgeed, Wasiirku ma laha awood noocaas ah duruufo kasta ha jireene.

**Qodobka 107aad Farqaddiisa 2aad**, oo ka hadlaya samaynta guddi baadhista shilalka, waxa uu sheegay in Wasiirku magacaabayo guddi ka kooban 5 xubnood marka shil sababa dhimasho ama dhaawac dhaco. Farqaddaas waan ka saaray, waxaanan ku beddelay in marka shil keena dhimasho ama dhaawac halis ahi dhaco ay baadhayaan **hay'adaha amniga**, maadaama ay iyagu hore ugu xil-saaran yihiin baadhista shilalka. Sidaas darteed, ma jirto sabab ay Wasaaraddu u baadho shil sababay khasaare naf iyo maalba leh.

Qodobada ka bilaabmaya **Qodobka 108aad ilaa Qodobka 112aad**, oo dhammaantood ka hadlaya qaabka loo baadhayo shilalka iyo sida dacwadahooda loo qaadayo, waxa ay awood u siinayaan Wasiirka iyo guddi uu magacaabayo. Maadaama baadhista shilalka iyo qaadista dacwadahoodu ay si buuxda u khusayso **hay'adaha amniga**, dhammaan qodobadaas waa in laga saaraa, si aanay Wasaaraddu ugu xad-gudbin hay'adaha amniga ee sharcigu u igmaday hawshaas.

**Qodobka 117aad Farqaddiisa 5aad**, oo ka hadlaya qaabka loo qaybinayo ajuurooyinka (royalty-ga), waxaan ku raacsanahay **Xildhibaan Aadam** in 10% loo qoondeeyo Gobolka aanu macno weyn samaynayn. Sidaas darteed, boqolkiiba 10%-ka Gobolka waxaan ku xoojiyay **Degmada iyo Tuulada**, anigoo Tuulada ka dhigay **15%**, Degmadana **15%**, Dawladda Dhexe **70%**, halka Gobolka aanu wax saamiga ah helayn. Lacagtaasi waa in lagu maalgeliyo kaabayaasha, dib-u-dejinta dadka barakacay, iyo baahiyaha adeegga bulshada, isla markaana lagu shubaa **sanduuq gaar ah**, halkii ay si toos ah u geli lahayd maamul deegaan.

**Qodobka 129aad Farqaddiisa 2aad**, oo ka hadlaya aasaaska sanduuqa dayactirka iyo ilaalinta deegaanka, sanduuqaasi waa mid muhiim ah maadaama qalab culus iyo cagafyo waaweyni ay waxyeello u geysanayaan deegaanka. Si kastaba ha ahaatee, xeerku waxa uu awoodda ku koobay Wasiirka. Waxaan soo jeediyay in sanduuqaasi uu yeesho **guddi 5 xubnood ah**, oo ka kala imanaya Wasaaradda Macdanta, Wasaaradda Deegaanka, Wasaaradda Arrimaha Bulshada, iyo Guddida Deegaanka iyo Khayraadka ee Golaha Wakiillada, si loo helo hufnaan iyo isla-xisaabtan.

**Qodobka 133aad**, oo ka hadlaya awoodaha xadhigga, waxa uu sheegay in sarkaal booliis oo ogolaansho haysta uu qof xidhi karo amar maxkamadeed la'aan. Qodobkaasi waan ka saaray, maadaama uu ka hor imanayo xuquuqda muwaadinka. Qof waxa la xidhi karaa oo keliya haddii lagu qabto isagoo dambi gacanta kula jira ama amar maxkamadeed jiro.

Gunaanad ahaan, waxaan tacsi u dirayaa **Wariyihii waynaa Wariye Sayid**, oo geeridiisu ahayd mid naxdin leh. Waxaan tacsi u dirayaa dhammaan bahda warbaahinta Somaliland, ehelkiisii iyo qaraabadiisii. Alle ha ka siiyo samir iyo iimaan, isaga naxariistii Jannadana ha ka waraabiyo. **WSC.**

**Qodobka 35aad** ee xeerka, oo ah ruqsad-bixinta macdanta, waxa ku jira lifaaqa labada nooc ee ganacsi ee liisamadooda ay bixiso Wasaaradda Ganacsigu, sida waafaqsan **Xeerka**

**Liisamada Ganacsiga Xeer Lr. 98/2021**. Halkaa waxaan soo jeedinayaa in aanay xeerarku iska hor iman, isla markaana labadaas xeer si wadajir ah loo eego oo la iswaafajiyo.

**Qodobka 37aad** ee xeerkan waa in lala akhriyaa **Xeerka Shirkadaha Qaranka Xeer Lr. 80/2018** iyo **Xeerka Liisamada Ganacsiga Xeer Lr. 98/2021**, haddii kale khilaaf ayaa iman doona, maadaama sida uu qodobkani u qoran yahay iyo sida ay qodobada xeerarkaasi u dhigan yihiin ay is khilaafayaan.

**Qodobka 71aad**, waxaan soo jeedinayaa in maadaama luuqadda aynu qaadanay ay tahay Af-Soomaali, halka ku qoran marka la qaadayo kharashka dib-u-cusboonaysiinta in kiiloomitirkiiba laga qaadayo lacag doollar ah. Doollarku luuqaddeenna ma aha, sidaas darteed waxaan soo jeedinayaa in Af-Soomaaliga laga dhigo luuqadda rasmiga ah ee lagu qeexayo lacagta. Haddii loo baahdo, ha lagu lifaaqo qiime-barbardhig si uu ula socdo isbeddelka sarifka caalamiga ah.

Mudane Guddoomiye, **Qodobka 117aad** oo ka hadlaya ajuurooyinka la bixinayo, waxaan soo jeedinayaa in qaabka uu u qoran yahay wax laga beddelo, waxaana ku talinayaa in loo dhigo sidan:– **60%** Dawladda Dhexe– **10%** Gobolka– **15%** Degmada– **15%** Tuullada

Sababtu waxa weeye, tuullada waa meesha ay ku nool yihiin dadka deegaanka. Xitaa haddii ay dhacdo in dadku ka guuraan goobta macdanta laga qodayo, haddana tuulladu waa halkii ay ka soo jeedeen, waana in baahiyahooda aasaasiga ahi ay si guud u wada gaadhaan bulshada.

**Qodobka 153aad** ee xallinta khilaafaadka, waxa muuqata in xeerku awoodaha intiisa badan ku ururiyey Wasiirka. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in meel kasta oo erayga “Wasiir” ku qoran yahay laga beddelo oo laga dhigo **Wasaaradda**, si aanay u muuqan in hay’addu noqotay mid hal qof ku ururtay.
Sidoo kale, xallinta khilaafaadka waa in loo xil-saaraa guddi uu Wasiirku ka mid yahay, balse aanay awooddu ku koobnaan. Gudiddaas waa in ay ku jiraan xildhibaanada deegaanka uu khilaafku ka taagan yahay, si ay si rasmi ah u metelaan tuullo, degmo ama gobol kasta oo arrintu khusayso.

Haddii degmadu aanay haysan cid si rasmi ah u metesha, waa in lagu daraa wax-garadka deegaanka sida cuqaasha, salaadiinta iyo dadka kale ee lagu kalsoon yahay, si ay si wadajir ah u xalliyaan khilaafaadka ka taagan goobahaas.

Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in maadaama xeerkani yahay **xeer aasaasi ah** oo muhiimad weyn u leh dalka, aan si degdeg ah loo ansixin. Waa in laga baaraan-degaa, waxyaabaha yar-yar ee u baahan kaabisna lagu daraa, talo ballaadhanna la sameeyaa, ka dibna si miyir leh loo ansixiyaa. Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin. **Wa bilaahi tawfiiq.**

**Md. Qaasim Aadam Saleebaan** (41 min, 29 sec):- Bismillaahi Raxmaani Raxiim, ASC WRW. Shir-guddoonka Golaha iyo xubnaha Golaha Wakiillada dhammaantood waan uga mahad-celinayaa in maanta inoo horyaallo xeerkii khayraadka macdanta ee Jamhuuriyadda Somaliland. Waxaan Guddida Khayraadka ku amaanayaa xilka ay iska saareen ka baaraan-degidda iyo kaabista xeerkan.

Waxaan sidoo kale u mahad-celinayaa dhammaan xubnihii ka qayb-qaatay doodda, kuwaas oo runtii taabtay qodobo aad muhiim ugu ah aasaaska xeerkan. Waxaan Golaha ku bogaadinayaa in marka aynu aragno in xeer u baahan yahay wakhti dheeraad ah, aynu dalbanno in wakhti dheeraad ah la inoo siiyo, sida xeerar hore oo Golaha soo maray. Waxaan filayaa in xeerkanina u baahan yahay wakhti dheeraad ah oo si qoto dheer looga baaraan-dego.

Xeerarka waxa curiya Xukuumadda, Golaha ama shacab tiradooda Dastuurku cayimay. Sida ka muuqata xeerkan, waxa soo diyaarisay wasaarad, waxaana meel walba ku qoran erayga "WASIIR". Arrintaas aad baa looga hadlay, Wasiirkuna waxa uu qaranka ku matalaa wasaarad. Sidaas awgeed, waxaan qabaa in erayga "Wasiir" meel walba looga beddelo **Wasaaradda**.

Markaan xeerkan akhris qoto dheer ku sameeyey, waxa ii cadaatay in qodobo badan laga soo guuriyey xeerar dalal kale u degsan oo aan inala duruuf ahayn. Taas awgeed, eray-bixin iyo hab-qoraal aan si buuxda ula jaan-qaadi karin duruufaha dalkeena ayaa ku jira. Qodobo badan ayaan u arkaa inaanay ku habboonayn xaaladda dhabta ah ee baadhista macdanaha Somaliland.

Waxaan xoojinayaa in xeerkan dib-u-eegis ballaadhan lagu sameeyo, Guddida Khayraadkuna ay ka faa'iidaysato aragtiyada iyo soo-jeedinta xubnaha Golaha, isla markaana ay xog-raadin ku sameeyaan deegaamada ay macdan-qodistu ka socoto, gaar ahaan goobaha la sheegay in dad ku naf waayeen.

Waxa kale oo xeerkan ku jira qodobo sheegaya in dawladda Somaliland ay khayraadka dalka ku leedahay 10% oo keliya. Arrintaasi waa meel-ka-dhac ku ah khayraadka qaranka iyo xaqa shacabkiisa. Waxaan qabaa in dawladda Somaliland ay ku yeelato khayraadka dalka saamiga ugu badan, ugu yaraan **51% ama ka badan**.

Sidoo kale, xeerku waxa uu ogolaanayaa in shati macdan-baadhis la siiyo shakhsiyaad. Anigu waxaan qabaa in si loo xakameeyo macdan-qodista loona helo isla-xisaabtan, shatiga lagu koobo shirkado awood leh oo lagula xisaabtami karo, halkii qof walba uu si gaar ah shati u qaadan lahaa.

Ugu dambayn, Cutubka 1aad, waxaan soo jeedinayaa in lagu lifaaqo **Qodobada 3aad iyo 4aad**, maadaama ay u egyihiin cutub gaar ah. Waxa kale oo xeerku sheegaya inuu ka kooban yahay 11 cutub, hase yeeshee Cutubka 6aad wuu ka maqan yahay, sidaas darteed cutubyadu waa 12. Qodobka 10aadna laba jeer ayuu ku soo noqday, taasoo tirada

qodobada ka dhigaysa 156 halkii ay ka ahaan lahayd 155. Sidoo kale, **Qodobka 7aad** waxa ka maqan Farqadda 1.4, taasna waa in la saxo.

Waxaan taageerayaa, isla markaana **xoojinayaa soo-jeedintii Guddida**, ee ahayd qaabka boqolkiiba ah ee ay Xukuumaddu u qaybinayso khayraadka dalka, ajuurooyinka ama wixii loogu yeedhoba, sida uu qeexayo **Qodobka 117aad Farqaddiisa 5aad**. Waxaan ku xoojinayaa in aan u arko in 10%-kii xeerka ku jiray ay 100% ka dhigeen, taas oo markaas noqonaysa farqi aad u yar. Anigu mar walba waxaan adkaynayaa in Dawladda, oo ah shacabka Somaliland iyo xukuumaddooduba, ay xaq u leeyihiin **51% iyo wax ka badan**.

Sidaas darteed, waxaan taageerayaa soo-jeedintooda ah in **65%** ay qaadato Dawladda Dhexe. Waxaan taageerayaa in **Gobolka**, oo ah meesha Degmada iyo Tuuladuba hoos yimaaddaan, isla markaana leh muhiimad ballaadhan oo qaran, la siiyo **15%**. Degmooyinka gobolkuna waa inay is-kaabaan, si degmadii wax laga helaa ay u kaabto degmooyinka kale, una noqonin mid horumar ahaan ka horeysa ama ka dambaysa degmooyinka kale ee isla gobolkaas. Waxaan taageerayaa in **10%** la siiyo Degmada laga helay khayraadka, sidoo kalena waxaan taageerayaa in **10%** la siiyo Tuulada laga helay, taas oo saamaxaysa in meel walba iyo cid walba lagu qanciyo wixii ay xaq u leeyihiin.

Waxaan qirayaa in lacagta la bixinayaa aanay ahayn mid si toos ah dadka loo qaybinayo, balse ay tahay mid **mashaariic horumarineed** loogu talagalay, si horumarinta dadka iyo deegaanka loogu fuliyo. Xeerkan meelaha qaarkood shidaal iyo gaas waxba kama muuqdaan, sidaas awgeed xeerkani wuxuu si gaar ah u khusayaa **khayraadka macdanaha oo keliya**.

Ogolaanshaha, sida aan hore u sheegay, waa in aan **shakhsiyaad** la siin, qof kastaana aan la siin. Sida meelaha qaarkood aan ku arkay, qofka soo hela ama soo sheega meel wax ku jiraan ayaa la siinayaa shatiga ugu horreeya, taas oo muujinaysa in xeerkani doonayo in dhammaan shanta ama lixda milyan ee reer Somaliland ay buuraha u dareeraan si ay u helaan shatigaas. Waxaan soo jeedinayaa in shatigaasi gacanta u galo **shirkado ama maal-gashadayaal shirkado ah oo maxalli ah**, kuwaas oo lagula xisaabtami karo dhibta ka iman karta baadhitaanka ay sameeyaan, dheefta ay soo saaraan iyo ilaalinta khayraadka dalka.

Shatiga la bixinayaa waa inuu noqdaa **mid cayiman**, oo lagu koobo goobo cayiman, isla markaana aanu noqon shati furan oo qof kasta la siinayo. Waa inuu noqdaa shati baloog gaar ah lagu siiyo, lana yidhaahdo intaas ayaad xaq u leedahay. Shirkaddu way codsan kartaa meel kale inay baadho, balse waa inay sugtaa jaaniskeeda inta ay ka dhamaystirayso hawsha baloogga loo xilsaaray.

Xeerkan waxa ku jira in dhowr hay'adood lagu dhex daray Wasaaradda, kuwaas oo ay ka mid yihiin aasaasida **Shirkadda Macdanta Qaranka**, samaynta **Guddida Baadhista Shilalka**, iyo magacaabista **Kormeerayaasha Macdanta**. Sida ku cad Dastuurka iyo xeerarka dalka, Wasaaraddu waa hay'adda masuulka ka ah arrimaha macdanta. Wasaaraddu iyadaa baadhi karta, dalban karta miisaaniyad ay ku baadho, wayna u gudbin kartaa Golaha

Wakiillada ama qaranka. Waxa kale oo ay ka qayb-qaadan kartaa soo-saarka, iyadoo shaqaalaysiinaysa khubarada ay u baahan tahay, isla markaana iibsanaysa qalabka ay u baahan tahay.

Sidaas awgeed, ma qabo in Wasaaraddu shaqadeedii ku wareejiso aasaasid shirkad macdan qaran ah, iyadoo aynu la soconno culayska ay shirkado is-dulsaaran ku hayaan dalka. Waxa aynu haysannaa Wasaaradda Shaqaalaha, Hay'adda Shaqaalaha, iyo Guddida Shaqo-Qaran, haddana hay'ado kale ayaa is-dulsaaraya. Sidaa darteed, waxaan qabaa in Wasaaraddu ay gudato waajibaadka qaran ee lagu aaminay.

Samaynta guddiyada baadhista shilalka iyo magacaabista kormeerayaasha macdanta waa lama huraan, waana sax. Shirkado lama iska diri karo, mana la siin karo xorriyad ay wax kasta sameeyaan. Waa in la helo **hay'ad kula xisaabtanta**, hay'addaas oo Golayaasheennu ay kor-joogtayn doonaan. Waxaan soo jeedinayaa in hay'adahaas kala duwan lagu mideeyo **Hay'adda Kor-joogtaynta Baadhista Macdanta Qaranka**, oo uu magacaabo **Madaxweynuhu**, kana noqota hay'ad lagu dhiso digreeto Madaxweyne, halkii Wasiir uu magacaabi lahaa. Hay'addani waxay noqon doontaa mid dabagasha shirkadaha, la xisaabtanta waxa ay soo saaraan, khasaareyaasha iyo shilalka ay gaystaan. Magaca hay'adda waa la hagaajin karaa haddii la helo eray-bixin ka habboon tan aan soo jeediyay.

Marka la eego dhammaan arrimahaas, waxay muujinayaan in xeerkani u baahan yahay **dib-u-eegis qoto dheer**. Waxaan soo jeedinayaa in ciqaab kasta oo ka dhalata xeerkan loo maro sida ay qabaan Dastuurka iyo xeerarka dalka, oo aan qofna si iskiis ah loo qaban karin, balse la raaco nidaamka sharci ee ay ka mid yihiin amarro maxkamadeed.

**Qodobka 3aad Farqaddiisa 2aad** waxa ku qoran in Wasiirku wax ka beddeli karo Jadwalka Koowaad. Waxaan qabaa in aanay habboonayn in Wasiir lagu awood siiyo wax ka beddelidda xeer la ansixiyay. Sidoo kale, Jadwalka Koowaad meesha kama cadda waxa uu yahay. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in farqaddaas meesha laga saaro ama loo beddelo soo-jeedin uu Wasiirku keeni karo, isla markaana si cad loo qeexo waxa loola jeedo Jadwalka Koowaad.

**Qodobka 6aad** ee mamnuucidda sahaminta, waxaan soo jeedinayaa in shakhsiyaad aan la siin shatiyo, isla markaana mamnuuc laga dhigo in qof shakhsi ah la siiyo shati, sida ku cad Farqadda **10.3**, oo odhanaysa qofka soo hela ama soo sheega meel wax ku jiraan la siinayo shatiga. Arrintaasi waxay caddeynaysaa khatartii aan ka digay ee ahayd in dadka buuraha loo diro.

Waxyaabaha muujinaya in xeerkan meel kale laga soo guuriyay oo aan turxaan-bixin lagu samayn, waxa tusaale u ah **Qodobka 6aad Farqaddiisa 7aad**, oo iyada oo laga hadlayo mamnuucidda sahaminta macdanta lagu soo daray erayga *"xuquuqda wada-iibsiga"*, kaas oo aan caddayn meesha uu ka yimid iyo waxa loola jeedo. Taasina waxay muujinaysaa in qodobka meel kale laga soo guuriyay. Sidaa darteed, waa in laga saaraa qodob kasta oo aan munaasib ku ahayn duruufaha dalkeena.

**Qodobka 7aad** ee noocyada ruqsadaha, Farqadda **1.4** ayaa ka maqan, sidaas awgeed Farqadda **1.5** waa in loo beddelaa **1.4**.

**Qodobka 10aad**, oo laba jeer ku soo noqday, isla markaana u akhrismaya **Qodobka 11aad** ee shaqaalaysiinta, waxaan xoojinayaa in shaqaalaysiinta mudnaanta koowaad la siiyo **dadka deegaanka** laga helay khayraadka. Shaqadu ha u furnaato dhammaan muwaadiniinta Somaliland, balse dadka deegaankaas ku nool ha yeeshaan mudnaanta koowaad, si looga hortago khilaafaad iyo iska-hor-imaadyo ka dhasha khayraadka laga helay dhulkooda.

**Qodobka 12aad**, oo u akhrismaya **Qodobka 13aad** ee ka-qayb-qaadashada Dawladda, waxa ku qoran 10%. Sidaan hore u sheegay, waxaan soo jeedinayaa in Dawladdu khayraadka dalka ku yeelato **51% iyo wax ka badan**, si aanu u noqonin khayraad la qaato oo shirkado si buuxda ugu tashadaan.

**Qodobka 13aad**, oo u akhrismaya **Qodobka 14aad**, kuna saabsan awoodaha iyo waajibaadka Wasaaradda, waxa ka muuqata baahida loo qabo **kala-xadaynta deegaamada**. Si looga hortago khilaafyo ka dhasha halka macdanta laga qodayo, waa in la xoojiyo Farqadda 3aad ee Qodobkan, lana dhaqangeliyaa **Xeerka Kala-xadaynta Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka**, maadaama tuulo, degmo iyo gobol kastaa uu saamiga ku leeyahay khayraadka, taas oo haddii aan si cad loo qeexin keeni karta carqalado iyo muran badan.

Waxaan **taageerayaa oo xoojinayaa soo-jeedintii Guddida** ee ahayd qaabka boqolkiiba ah ee ay Xukuumaddu u qaybinayso khayraadka dalka, ajuurooyinka ama wixii loogu yeedhoba, sida uu qeexayo **Qodobka 117aad Farqaddiisa 5aad**. Waxaan ku xoojinayaa in aan u arko in 10%-kii xeerka ku jiray loo beddelay qaab aan wax weyn ka tarayn, taas oo markaa noqoneysa farqi aad u yar. Anigu mar walba waxaan adkaynayaa in **Dawladda**, oo matalaysa shacabka Somaliland iyo xukuumaddooduba, ay xaq u leeyihiin **51% iyo wax ka badan**.

Sidaas darteed, waxaan **taageerayaa soo-jeedinta** ah in **65%** ay qaadato Dawladda Dhexe. Waxaan taageerayaa in **Gobolka**, oo ay hoos yimaaddaan Degmada iyo Tuuladu isla markaana leh muhiimad ballaadhan oo qaran, la siiyo **15%**. Degmooyinka gobolkuna waa inay is-kaabaan, si degmadii wax laga helaa ay u kaabto degmooyinka kale, isla markaana aanu noqonin gobolka ama degmooyinkiisu kuwo horumar ahaan kala fogaanaya. Waxaan taageerayaa in **10%** la siiyo Degmada laga helay khayraadka, sidoo kalena waxaan taageerayaa in **10%** la siiyo Tuulada laga helay, taas oo suurto-gelinaysa in meel walba iyo cid walba lagu qanciyo wixii ay xaq u leeyihiin.

Waxaan qirayaa in lacagta la siinayo aanay ahayn mid si toos ah dadka loo qaybinayo, balse ay tahay mid **mashaariic horumarineed** loogu talagalay, si horumarinta dadka iyo deegaanka loogu fuliyo. Xeerkan meelaha qaarkood shidaal iyo gaas kama muuqdaan, sidaas awgeed xeerkani wuxuu si gaar ah u khusayaa **khayraadka macdanaha oo keliya**.

Ogolaanshaha, sidaan hore u sheegay, waa in **aan shakhsiyaad la siin**, qof kastaana aan la siin ogolaansho. Sida aan meelaha qaarkood ku arkay, qofka soo hela ama soo sheega meel wax ku jiraan ayaa la siinayaa shatiga ugu horreeya, taasina waxay caddeyneysaa in xeerkani doonayo in shanta ama lixda milyan ee reer Somaliland ay buuraha u dareeraan si ay u helaan shatigaas. Waxaan soo jeedinayaa in shatigaasi uu gacanta u galo **shirkado ama maal-gashadayaal shirkado ah oo maxalli ah**, kuwaas oo lagula xisaabtami karo dhibta ka iman karta baadhitaanka ay sameeyaan, dheefta ay soo saaraan, iyo ilaalinta khayraadka dalka.

Shatiga la bixinayaa waa inuu noqdaa **mid cayiman**, oo goobo cayiman lagu siiyo, isla markaana aanu noqon shati furan oo qof kasta la siinayo. Waa inuu noqdaa shati **baloog gaar ah** lagu siiyo, lana yidhaahdo intaas ayaad xaq u leedahay. Shirkaddu way codsan kartaa meel kale inay baadho, balse waa inay sugtaa jaaniskeeda inta ay dhamaystirayso hawsha baloogga loo xilsaaray.

Xeerkan waxa ku jira in dhowr hay'adood lagu dhex daray Wasaaradda, kuwaas oo ay ka mid yihiin **aasaasidda Shirkadda Macdanta Qaranka**, **samaynta Guddida Baadhista Shilalka**, iyo **magacaabista Kormeerayaasha Macdanta**. Sida ku cad Dastuurka iyo xeerarka dalka, **Wasaaraddu** waa hay'adda masuulka ka ah arrimaha macdanta. Wasaaraddu iyadaa baadhi karta, dalban karta miisaaniyad ay ku baadho, una gudbin karta Golaha Wakiillada ama qaranka, kana qayb-qaadan karta soo-saarka, iyadoo shaqaalaysiinaysa khubarada ay u baahan tahay, isla markaana iibsanaysa qalabka ay u baahan tahay.

Sidaas awgeed, ma qabo in Wasaaraddu shaqadeedii ku wareejiso **aasaasid shirkad macdan qaran ah**, anagoo la soconna culayska ay shirkado is-dulsaaran ku hayaan dalka. Waxa aynu haysannaa Wasaaradda Shaqaalaha, Hay'adda Shaqaalaha iyo Guddida Shaqo-Qaran, haddana hay'ado kale ayaa is-dulsaaraya. Sidaa darteed, waxaan qabaa in Wasaaraddu ay gudato waajibaadka qaran ee lagu aaminay.

Samaynta guddiyada baadhista shilalka iyo magacaabista kormeerayaasha macdanta waa lama huraan, waana sax. Shirkado lama iska diri karo, mana la siin karo xorriyad ay wax kasta sameeyaan. Waa in la helo **hay'ad kula xisaabtanta**, hay'addaas oo Golayaasheennu ay si dhow u kor-joogtayn doonaan. Waxaan soo jeedinayaa in hay'adahaas kala duwan lagu mideeyo **Hay'adda Kor-joogtaynta Baadhista Macdanta Qaranka**, oo uu magacaabo **Madaxweynuhu**, kana noqota hay'ad lagu dhiso digreeto Madaxweyne, halkii Wasiir uu magacaabi lahaa. Hay'addani waxay noqon doontaa mid dabagasha shirkadaha, la xisaabtanta waxa ay soo saaraan, khasaaraha iyo shilalka ay gaystaan. Magaca hay'adda waa la hagaajin karaa haddii la helo eray-bixin ka habboon tan aan soo jeediyay.

Marka la eego dhammaan arrimahaas, waxay muujinayaan in **xeerkani u baahan yahay dib-u-eegis qoto dheer**. Waxaan soo jeedinayaa in ciqaab kasta oo ka dhalata xeerkan loo maro sida ay qabaan Dastuurka iyo xeerarka dalka, oo aan qofna si iskiis ah loo qaban karin, balse la raaco nidaamka sharci ee ay ka mid yihiin **amarro maxkamadeed**.

**Qodobka 3aad Farqaddiisa 2aad** waxa ku qoran in Wasiirku wax ka beddeli karo **Jadwalka Koowaad**. Waxaan qabaa in aanay habboonayn in Wasiir lagu awood siiyo wax ka beddelidda xeer la ansixiyay. Sidoo kale, Jadwalka Koowaad meesha kama cadda waxa uu yahay. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in farqaddaas meesha laga saaro ama loo beddelo **soo-jeedin Wasiir** oo keliya, isla markaana si cad loo qeexo waxa loola jeedo Jadwalka Koowaad.

**Qodobka 6aad** ee mamnuucidda sahaminta, waxaan soo jeedinayaa in **shakhsiyaad aan la siin shatiyo**, isla markaana mamnuuc laga dhigo in qof shakhsi ah la siiyo shati, sida ku cad Farqadda **10.3**, oo odhanaysa qofka soo hela ama soo sheega meel wax ku jiraan la siinayo shatiga. Arrintaasi waxay mar kale caddeyneysaa khatartii aan ka digay ee ahayd in dadka buuraha loo diro.

Waxyaabaha muujinaya in xeerkan meel kale laga soo guuriyay oo aan turxaan-bixin lagu samayn, waxa tusaale u ah **Qodobka 6aad Farqaddiisa 7aad**, oo iyada oo laga hadlayo mamnuucidda sahaminta macdanta lagu soo daray erayga *"xuquuqda wada-iibsiga"*, kaas oo aan caddayn meesha uu ka yimid iyo waxa loola jeedo. Taasina waxay muujinaysaa in qodobka meel kale laga soo guuriyay. Sidaa darteed, waa in laga saaraa qodob kasta oo aan munaasib ku ahayn duruufaha dalkeena.

**Qodobka 7aad** ee noocyada ruqsadaha, Farqadda **1.4** ayaa ka maqan, sidaas awgeed Farqadda **1.5** waa in loo beddelaa **1.4**.

**Qodobka 10aad**, oo laba jeer ku soo noqday, isla markaana u akhrismaya **Qodobka 11aad** ee shaqaalaysiinta, waxaan xoojinayaa in shaqaalaysiinta **mudnaanta koowaad** la siiyo dadka deegaanka laga helay khayraadka. Shaqadu ha u furnaato dhammaan muwaadiniinta Somaliland, balse dadka deegaankaas ku nool ha yeeshaan mudnaanta koowaad, si looga hortago khilaafaad iyo isku-dhacyo ka dhasha khayraadka laga helay dhulkooda.

**Qodobka 12aad**, oo u akhrismaya **Qodobka 13aad** ee ka-qayb-qaadashada Dawladda, waxa ku qoran 10%. Sidaan hore u sheegay, waxaan soo jeedinayaa in Dawladdu khayraadka dalka ku yeelato **51% iyo wax ka badan**, si aanu u noqonin khayraad la qaato oo shirkado si buuxda ugu tashadaan. Arrintani waxay la mid noqon lahayd shidaalka, oo haddii maanta dalkeena laga helo, ay noqonayso in aynu 10% keliya ku yeelanno, taas oo ah **khalad sharci iyo mid qaran**.

**Qodobka 13aad**, oo u akhrismaya **Qodobka 14aad**, kuna saabsan awoodaha iyo waajibaadka Wasaaradda, waxa ka muuqata baahida loo qabo **kala-xadaynta deegaamada**. Si looga hortago khilaafyo ka dhasha halka macdanta laga qodayo, waa in la xoojiyo Farqadda **3aad** ee Qodobkan, lana dhaqangeliyaa **Xeerka Kala-xadaynta Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka**, maadaama tuulo, degmo iyo gobol kastaa uu saamiga ku leeyahay khayraadka. Haddii aan si cad loo qeexin, waxay keeni kartaa carqalado iyo muran badan.

Sidoo kale, **awoodaha Xukuumadda** waa in ay Xukuumaddu si cad u qeexdaa **saamigeeda ay macdanta ku leedahay**, isla markaana aanu noqon wax qarsoodi ah oo laga qariyo shacabka reer Somaliland marka shirkad la siinayo. Waa in si cad loo ogaadaa. **Baadhis iyo helis waa laba arrimood oo kala duwan**; baadhistu waxay raacaysaa nidaam iyo hannaan uu xeerku qeexayo, balse marka khayraadkaas la helo waa in Xukuumaddu qeexdaa saamiga aynu ku leenahay.

Arrintan waa in lagu caddeeyaa **Qodobka 13aad ee u akhrismaya Qodobka 14aad**, isla markaana lagu kaabaa in Xukuumaddu si rasmi ah u qeexdo saamigeeda ay ku leedahay macdanta dhulka laga helay. Sidoo kale, waa in lagu daraa in Xukuumaddu **jaangoynayso qiimaha macdanta**, iyadoo la jaanqaadaysa dhaq-dhaqaaqyada suuqyada caalamka. Ma aha wax macquul ah in macdan dal laga soo saaro kadibna shirkad kali ahi qiime uun iska dejiso. Waa in Xukuumadda iyo shirkaddu **isku af-gartaan qiimaha**, iyadoo Xukuumaddu samaynayso baadhitaan buuxa oo ku saabsan qiimaha uu khayraadkaasi caalamka ka joogo, si aanay shirkaddu u odhan "intan ayaan idin siinayaa" iyadoo qiimuhu aad uga hooseeyo kan dhabta ah. Sidaas darteed, waa in Xukuumaddu jaangoyso qiimaha lagu kala gadanayo macdanaha kala duwan.

Sidoo kale, **awoodaha Xukuumadda** waa in ay ka mid noqotaa **qoondaynta cashuuraha** ku waajibaya shirkadaha qodista macdanaha, isla markaana si cad loo qeexo waxa laga qaadayo shirkadahaas. Waa in aanay noqon mid sannadba sida loo doono loo maareeyo, sida "sannadkan cashuur-dhaaf ayaan siinay" ama qaabab kale oo aan joogto ahayn. Si arrintaasi u dhicin, waa in xeerku noqdaa **mid cad, joogto ah, dhaqangal ah**, isla markaana dalka iyo dadkaba wax u taraya.

Isla **Qodobka 14aad ee u akhrismaya 13aad**, waxaan sidoo kale ku darayaa **farqad cusub** oo u dhiganta sidan: "In shirkadaha laga ilaaliyo inay ka gudbaan aagga ama baloogga loo qoondeeyay, isla markaana aanay u gudbi karin meel ka baxsan aagga loogu talo-galay." Arrintani waa inay ka mid noqotaa **awoodaha Xukuumadda** iyo heshiisyada lala galayo shirkadaha.

**Qodobka 14aad ee u akhrismaya Qodobka 15aad**, oo ka hadlaya awoodaha iyo waajibaadka Wasiirka, wuxuu muujinayaa qaabka loo qorsheeyay xeerkan. Sida uu hadda u qoran yahay, awoodaha Wasaaradda waa 14 farqadood, halka awoodaha Wasiirka la siiyay ay gaarayaan 17 farqadood. Taasi waxay muujinaysaa in Wasiirka laga hormariyay Wasaaradda. Anigu waxaan qabaa in **awoodahaas iyo waajibaadka Wasiirka gebi ahaanba laga saaro**, lana hoos geeyo Wasaaradda, isla markaana wixii aan laga maarmi karin lagu daro awoodaha Wasaaradda. Sidaan hore u soo sheegay, **meel kasta oo Wasiir ku qoran ha loo beddelo Wasaarad**.

Xog-ogaal waraysi aan sameeyay waxa la ii sheegay in Wasiirkii Xukuumaddii hore ee Madaxweyne Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) uu ku adkaa bixinta shatiyada baadhista macdanaha, taas oo si dhab ah u ilaalisay khayraadkii dalka. Dalalku guud ahaan way ilaashadaan khayraadkooda, wayna ka taxaddaraan sida loo baadho, loo soo saaro

loona iibiyo. Wasiirkaas hore waan ku ammaanayaa ilaalinta iyo xifdinta hantidii qaranka ee shacabka reer Somaliland lahaayeen.

Hase yeeshee, waxa la ii sheegay in labadii Wasiir ee ka dambeeyay ay si furan u bixiyeen shatiyo badan, ilaa heer la yidhaahdo guri walba oo reer Somaliland ahi waxa uu haystaa shati macdaneed. Arrintaas waxaan soo jeedinayaa in Goluhu ama Guddida ay khusayso **baadhitaan buuxa ku sameeyaan**, isla markaana si dhab ah loo dabagalo.

Inkasta oo xeerku aad u dheer yahay, haddana Xildhibaanadu ha ii dul-qaataan inta aan aragtidaydan dhamaystirayo.

**Qodobka 17aad ee u akhrismaya Qodobka 18aad** (cidda ka reeban), Farqadihiisa 1.1 ilaa 1.6, maadaama ay shakhsiyaad iyo da' ka hadlayaan, anigu waxaan ku adkaysanayaa fikraddii aan hore u soo jeediyay ee ahayd in **xeerkani aanu shati siin shakhsiyaad**, sidaas darteed farqadahaas badankood looma baahna. Farqadda 4aad ee qodobkaas oo odhanaysa "Wasiirku wuu diidi karaa" waxaan soo jeedinayaa in **Wasiirka lagu beddelo Wasaaradda**.

Sidoo kale, Farqadaha 5aad iyo 6aad diidmo ma aha sida Qodobku guud ahaan uga hadlayo, balse waxay muujinayaan in xeerku meel kale laga soo guuriyay. Tusaale ahaan, Farqadda 6aad waxay leedahay Wasaaraddu waa inay yeelataa cinwaan laga soo xidhiidho, taasina diidmo ma aha. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in Farqadahaas 5aad iyo 6aad loo beddelo **shuruudo shirkadda looga baahan yahay**, sida:

- in shirkadda ruqsadda haysataa yeelato **wakiil gudaha Somaliland**,
- in ay yeelato **cinwaan rasmi ah** oo lagala soo xidhiidho,
- in ay noqoto **shirkad dhaqan wanaagsan iyo aaminaad leh**,
- in ay yeelato **hanti ma-guurto ah** si loola xisaabtamo,
- in ay haysato **dhaqaale ku filan** baadhis, soo-saaris iyo daboolidda khasaaraha ay keeni karto.

**Qodobka 18aad iyo Qodobka 19aad** waxa si aad ah ugu soo noq-noqday erayga Wasiir, Wasiir, Wasiir; sidaa darteed waxaan mar kale xoojinayaa in **Wasiirka lagu beddelo Wasaaradda**.

**Qodobada 24aad ilaa Qodobka 31aad** dhammaantood waxay ka hadlayaan aasaasidda Shirkadda Macdanta Qaranka. Sidaan hore u caddeeyay, **Wasaaraddu** ayay saaran tahay masuuliyadda baadhista macdanaha; wixii khubaro ama dhaqaale ah ee ay u baahan tahayna way ka dalban kartaa qaranka, Golayaashuna way u ansixinayaan. Sidaa awgeed, waxaan qabaa in qodobadaas oo dhan **aan loo baahnayn**.

**CUTUBKA AFRAAD – Heshiiska Macdanta Qodobka 32aad ee u akhrismaya Qodobka 33aad**, waxaan ku sameeyay kaabis ah in heshiiska macdaneed si cad loogu daro:

- in **qiimaynta macdanta ay masuul ka tahay Wasaaradda**, iyadoo ka cabbir qaadanaysa suuqyada caalamka;
- in shirkadda ruqsadda la siinayo ay bixiso **lacag curaar ama dhigaal ah** oo u dhaxaysa **$100,000 USD ilaa $1,000,000 USD**, si aanay shirkaddu u baadhin ama u soo saarin macdan iyada oo aan wax dammaanad ah laga haynin;
- in **muddada heshiiska ugu dheer ay noqoto 5 sano**, isla markaana dib loo cusboonaysiin karo shan sano shan sano, iyadoo lagu salaynayo waxqabadka shirkadda, sida ay ula dhaqanto deegaanka, iyo masuuliyaddeeda guud. Shirkad gudata waajibaadkeeda waa la cusboonaysiin karaa, halka shirkad ku fashilanta laga qaadi karo shatiga, sida xeerku qeexayo.

**Qodobka 33aad ee u akhrismaya Qodobka 34aad** (heshiisyada gaarka ah), Farqadda 3aad waa in laga saaraa, maadaama Farqadda 2aad ay hore u sheegtay in heshiisyada loo raacayo Qodobka 32aad.

**Qodobka 105aad ee u akhrismaya Qodobka 106aad** (awoodda baadhista), dhammaadka Farqadda 2aad ee leh "Wasaaraddu waxay amri kartaa" waa in loo beddelaa **"Hay'addu waxay amri kartaa"**, maadaama Hay'addu tahay tan masuulka ka ah.

**Qodobka 106aad ee u akhrismaya Qodobka 107aad** (shilalka la soo warinayo), hay'addu waa inay qaaddaa masuuliyadda buuxda. Marka laga hadlayo Farqadda 1aad oo ka hadlaysa dhimasho iyo dhaawacyo halis ah, waxaan ku darayaa **"dhaawacyo fudud"**, si shil kasta oo ka dhaca goob macdan laga baadhayo loo baadho loona wargeliyo Hay'adda Kor-joogtaynta Macdanta, iyaduna u wargeliso hay'adaha kale ee khuseeya sida Wasaaradda iyo saldhigyada amniga.

**Qodobka 107aad** oo u akhrismaya **Qodobka 108aad**, ee ku saabsan **samaynta guddida baadhista shilalka**, sidaan hore u sheegay, **guddidaas looma baahna**. Shirkadda la siiyey ruqsaddu ayaa qaadanaysa dhammaan hawlahaas. **Hay'adda kor-joogtaynta** ayaa runtii culays badan ka dejinaysa Wasaaradda iyo Golahaba, waxayna inoo xaqiijinaysaa khayraadka dalka laga helay **qaabka loo soo saaray**, **amnigiisa iyo bad-qabkiisa**, **qiimaha lagu iibiyey** iyo **sida loo dhoofiyey**. Waa halka ay guddiyadeenna daba-galku ka heli doonaan xogta ugu badan. Sidaa awgeed, waxaan xoojinayaa in **hay'addaas kor-joogtayntu noqoto hay'ad loo baahan yahay oo la aasaaso**, isla markaana **hay'adaha kale ee hawshaas ku jira meesha laga saaro**.

**Qodobada 130aad iyo 131aad** oo u akhrismaya **Qodobka 131aad iyo Qodobka 132aad**, ee ku saabsan **awoodda kormeerista iyo baadhista**, awoodaha ku qoran waa in **si buuxda loo siiyaa hay'addaas**, isla markaana ay noqdaan masuuliyaddeeda.

**CUTUBKA 11AAD** oo u akhrismaya **CUTUBKA TOBNAAD**, **Qodobka 150aad** oo u akhrismaya **Qodobka 151aad**, Farqaddiisa 1aad oo sheegaysa in **Dawladda ay yeelanayso**

**10%**, waxaan soo jeedinayaa in **Xukuumaddu yeelato 51% ama ka badan** saamiga baadhista macdanaha.

Runtii, qodobo badan oo u baahnaa in laga hadlo oo wakhti dheeraad ah loo helo way jiraan, balse duruufaha inagu xeeran awgeed waxaan maanta ku soo gabo-gabaynayaa intaas. Waxaan xoojinayaa in **xeerkan dib loogu celiyo guddidii**, guddiduna ay ka faa'iidaysato **cilmi-baadhista iyo doodda ballaadhan ee Goluhu wakhti geliyey**, isla markaana ay saxdo, si xeerka Golahan ka baxayaa u noqdo **xeer wax-tar u leh Qaranka iyo Shacabka**. Waxaan adkaynayaa in **xeer aan ku qumanayn ama khilaaf keenaya aanu Golahan ka bixin**, balse la hakiyo lana celiyo inta awoodeenna ah. **Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin. WSC.**

**Md. Nuur Cismaan Guuleed** **(05 daqiiqo, 26 ilbiriqsi):** Bismillaah, Ilaahay baa mahad leh. Waad mahadsan tahay Mudane Guddoomiye. Mar labaad waxaan u mahad-celinayaa guddidii ka soo shaqaysay hawshan.

Magacaygu waa **Nuur Cismaan Guuleed**. Waxaan xubin ka ahaa **Golaha Deegaanka Saylac** muddo **11 sano ah**, sidoo kale **3 sano** waxaan soo ahaa **Badhasaab**. Taas waxaan uga jeedaa inaan si fiican u fahamsanahay **macnaha maamulka iyo hab-dhaqanka dawliga ah** ee dalka ka jira.

Qodobka ugu horreeya ee aan soo jeedinayaa waa in **macdanta aynu ka hadlayno** iyo **shidaalka** si cad **loo kala saaro**, maadaama shidaalkuna yahay macdan, isla markaana **shidaalku aanu si aan kala sooc lahayn ugu dhex jirin xeerkan**.

Qodobada kale ee aan ka hadlayo, waxaan ku raacsanahay **Xildhibaan Maxamed Abiib** (inkasta oo uu maqan yahay) qodobbo badan oo uu soo jeediyey. Sidoo kale, waxaan ku raacsanahay **Xildhibaan Xirsi**, iyo **Xildhibaan Maxamed Khadar** oo ka hadlay **guddida khilaafaadka**—qodobkaasna waan ku waafaqsanahay.

**Qodobka 117aad** ee ku saabsan **qaybinta**, aniga waxay ila tahay in qaabka ku qoran uu habboon yahay. Nidaamkeennu wuxuu ka kooban yahay **laba heer**:

1. **Xukuumadda Dhexe**,
2. **Dawladda Hoose**.

Anigu **qaybta la yidhaahdo "Gobol"** waan ka saaraya, sababtoo ah gobolku wuxuu ka tirsan yahay Xukuumadda. Xukuumaddu waa cidda awood u leh inay cid kasta u xil-saarto hawsha. Gobolku wax gaar ah oo uu leeyahay anigu ma qabo. Dadka gobolku waa dad degmooyin leh, waxaana qabaa in **degmooyinka** loo dhiibo masuuliyaddaas.

Sidoo kale, **boqolkiiba 30%** ee deegaanka loo qoondeeyey, anigu waxaan soo jeedinayaa in: **25%** la siiyo **Degmada**, **5%** la siiyo **Tuulada**, **70%** ay qaadato **Xukuumadda Dhexe**.

Lacagta Degmada loo qoondeeyey waa inay ku baxdaa **mashaariic horumarineed**, mana aha lacag si toos ah bangiga looga saaro ama jeeg qof loo qoro, balse waa inay noqotaa lacag **mashaariic gaar ah lagu fuliyo**. Sidoo kale, waa in lagu daraa qodob dhigaya in **masuuliyadda deegaanka** ay qaadato **cidda wax qodaysa**.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac (04 daqiiqo, 13 ilbiriqsi):** Mahadsanid Mudane Guddoomiye. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadda, **Asalaamu Calaykum**. Mudane Guddoomiye, inta aanan gelin doodayda, waxaan soo jeedinayaa in **xeerarka aynu ansixinayno** ay noqdaan xeerar **si qoto dheer looga baaraandegay**, oo **faa'iido u leh bulshada**. Maalmihii dhawaa xeerar aynu ansixinay ayaa ka soo noqday **ra'yi-celin (feedback)** aan wanaagsanayn, sida **Xeerkii Caymiska** iyo **Xeerkii Qaxootiga**.

Sidaa awgeed, marka aynu xeerar samaynayno waa in ay noqdaan **xeerar cad, la fahmi karo, una adeegaya danaha bulshada**, maadaama xeerarkaasi yihiin kuwo **muddo dheer lagu dhaqayo**.

Markaan ku soo noqdo **Xeerka Macdanta**, runtii waa xeer muhiim ah, balse waa xeer **aad u adag (complicated)** oo waxyaabo badan is-dhex yaaceen. Sida xildhibaanadu hore u sheegeen, waa in **macdanaha la kala saaraa**, lana caddeeyaa **noocyadooda iyo sida loo isticmaalo**, maadaama macdantu kala duwan tahay. Waxaan soo jeedinayaa in **xeerkan la fududeeyo**, lana caddeeyo, si aanay bulshadu ugu jahawareerin.

Ugu dambayn, Guddoomiye, ciddii looga baahnaa inay xeerarka **si qoto dheer u daraaseeyaan** waa **cidda halkan fadhida**. Xeerarku muddo ayay ina horyaalleen, khubaro waa loo gudbiyey, sidaa awgeed waxa loo baahan yahay **ka-qaybgal dhab ah (contribution)**. Qof walba waa inuu **wakhti geliyo**, **baadhis sameeyo**, si xeerarka aynu samaynayno ay u noqdaan kuwo tayo leh, isla markaana **Qaranka anfaca**.

**Md. Cali Xaamud Jibriil – Guddoomiye-ku-xigeenka 2aad (05 daqiiqo, 03 ilbiriqsi):** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudanayaal iyo Shir-guddoon, waxaan leeyahay **xeerkan macdantu wuxuu u baahan yahay ka-fiirsi badan**, maadaama dalku aanu hore u lahayn **xeer macdan oo dhamaystiran**.

Mid ka mid ah mushkiladaha soo kordhay waa **liisamada faraha badan** ee laga qaatay **Wasaaradda Macdanta**. Ku dhowaad **95% ama 99%** dhulka lagu tuhmay macdan ayaa liisamo laga bixiyey, dadna way haystaan. Dad badan oo liisamada qaatay waxay u haystaan inay **iibiyaan** marka shirkad timaaddo ama ay **xannibaan** shirkadaha wax qodaya. Taasi waa **is-dhex-gal dano (conflict of interest)**, mana dan u aha **dadka deegaanka iyo Qaranka Somaliland**.

Sidaa awgeed, waxa loo baahan yahay in xeerkan **si qoto dheer looga shaqeeyo**, lana xakameeyo liisamada, tusaale ahaan in la yidhaahdo **liisan ma jiri karo wax ka badan 6 bilood**, si qofku marka uu diyaar garoobo uu u qaato liisan sax ah. Taasi waxay **anfici doontaa dadka deegaanka iyo Qarankaba**.

Sababta ay u anfici doonto ayaa ah in **shirkadaha macdanta qodaya oo kaliya** ay dalka imanayaan oo si dhab ah u qodaya. Haddii kale, waxa imanaysa xaaladda maanta taagan ee ah in **liisamada ay Wasaaraddu bixiso**, nin walbana uu **jeebka ku haysto**, mid deegaan ku sheegta meesha iyo mid kale, sida dacwado badan oo ay Wasaaraddu sheegtay ay maanta taagan yihiin, kuwaas oo aan badhkood ka war hayo. Taasi waxay keeni doontaa in **dadkii deegaanka iyo Qarankuba ay ku waxyeeloobaan**, isla markaana **shirkadihii faraha badnaa ee dalka wax u tari lahaa**, wax qodi lahaa, Qarankana dakhli u soo geli lahaa ama macdanta dhoofin lahaa, ay baaqdaan. Taas beddelkeeda waxa imanaya in **shirkad mar timaaddo**, ay tidhaahdo wax yar baan dhoofinayaa, laba ama saddex konteenar ay rarto—sida maanta jirta—dabadeedna ay meel kale u guurto.

Waxa ka sii daran in **liisamada qaarkood weligood la haysto**, iyada oo sannadkii cusboonaysiin yar la bixinayo. Sidaa darteed, waxa ka qurux badan in **xeerkan lagu daro in dhammaan liisamada la laalo**, isla markaana liisanku noqdo mid **shirkadda wax qodaysa kaliya la siinayo**, si ay si toos ah u qoddo. Dadka shacabka ah ee deegaanka ku noolna—meesha ay doonaan Somaliland ha ka ahaadeene—way ka faa'iidaysanayaan, wax bay ku leeyihiin, shaqo bay ka helayaan, dakhli ayaana ka soo gelaya, Qarankiina dakhli buu ka helayaa.

Waxaan kaloo ku darayaa in **sample-ka la qaadayo** oo la yidhaahdo "waa la dirayaa" aanu ka badnaan karin wax yar. Laakiin sida maanta dhacday—oo aan marar badan ka khati ka ahay—**konteenarro dhan ayaa la dhoofiyaa**, iyada oo lagu sheegayo "sample", cashuurna lagama qaadayo. Taasi caqli ahaan waa mid aan la qaadan karin; konteenar dhan in lagu yidhaahdo waa sample waa wax ka baxsan fahamka. Qaranka waxay ku tahay **nusqaan**, dadka deegaankana waa la xaalufiyey, cid gaar ah ayaana ka faa'iidaysanaysa.

Haddaba, Mudanayaal, maadaama aynu nahay **xeer-dejintii ummadda**, isla markaana aynu nahay **wakiilladii shacabka**, waxaan soo jeedinayaa in **xeerkan si cad loogu daro sample-ka**, lana qeexo waxa sample noqon kara, si arrintaasi u noqoto mid xeerku caddeeyo.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in **liisamada dabada furan ee jeebka lagu wada sito** la joojiyo. Waa inaanu jirin liisan jeeb lagu sito. Liisanku waa inuu noqdaa mid **marka la siiyo hawlgal (operation) bilaabmaya**. Qofka hal mar la siiyo oo aan hawlgal samayn, haddii mar labaad ka dhacdo waa loo kordhin karaa, haddii kale **cid kale oo hawlgal samayn karta** ha la siiyo. Taas waxaan uga jeedaa in **shacabka deegaanka iyo Qarankuba ay si toos ah uga faa'iidaystaan**, halkii uu dilaal suuq jooga oo Wasaaradda Macdanta liisan jeebka ku haystaa uu odhan lahaa "anigaa meesha haysta, adiguna iga dhaqaaji". Taasi waa mushkiladda maanta taagan ee Qaranku meelo badan dakhli uga heli kari lahaa, halka shacabka deegaankana lagu dul haysto.

Arrintaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **xeerkan si qoto dheer looga fiirsado**, si aad ahna loo akhriyo, isla markaana **Guddida Khayraadku** uga fiirsato qodobada bislaaday ee

aynu tafa-tirnay, kuwaas oo **Qaranka iyo Shacabka labadaba faa'iido u ah**, lana dhex-saaro dilaaliinta ku dhex dhuumanaya liisamada jeebka lagu sito. Intaas ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Axmed Yuusuf Nuur (Guruuje)** **(10 daqiiqo, 16 ilbiriqsi):** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Waxaan jeedinayaa in qayb ka mid ah doodda xeerkan aan ku daro **afar qodob** oo iila muuqda kuwo muhiim ah.

**Qodobka 1aad:** Xeerkan waxaad mooddaa in loogu talagalay **wasiir dhaqan-joog ah**, oo u muuqda in qofka xilka loo magacaabo ama xafiis dawladdeed jooga uu weligiis joogayo, xafiiskiina isaga leeyahay. Sidaa darteed, awoodaha oo dhan ayuu isku koobayaa, goor dambena arrintaasi caqabad bay ku noqotaa waddanka. Xeer waxa loogu talagalay inuu noqdo **mid joogto ah, nidaamsan, sharci iyo siyaasad leh**. Wasaaraddu waxay ka kooban tahay qaybo badan: wasiir, wasiir-ku-xigeen, agaasime guud, agaasimeyaal iyo shaqaale khubaro ah oo waaya-arag ah. Shaqaalahaasi waa kuwa ay tahay in shaqada la siiyo, doorna ku yeeshaan. Hase yeeshee, xeerkan bilow ilaa dhammaad waxa ku qoran "wasiir baa oggolaanaya, wasiir baa diidaya, wasiir baa fasaxaya".

Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in **meel kasta oo wasiir ku qoran lagu beddelo Wasaaradda**, si ay wasaaraddu u raacdo xeerkeeda iyo nidaamkeeda.

**Qodobka 2aad:** Dunida maanta waxa ugu muhiimsan—diinta ka dib—waa **deegaanka**. Macdanta iyo xooluhuba waxay ka hooseeyaan deegaanka. Deegaanka malaayiin sano ayaa lagu noolaa, dhibaatooyin badanna waa loo geystay. Sidaa darteed, haddii la doonayo in mustaqbalka lagu sii noolaado, waa in deegaanka si dhab ah loo ilaaliyaa. Dunidu maanta deegaanka ayay ilaalisaa, innaguna waa ummad Muslim ah oo Ilaahay ina amray ilaalinta deegaanka.

Meel kasta oo macdan laga qodo maanta waxa yaalla bac, caagad, iyo wasakh. Qiimaha macdantaas laga helaa boqol laabkiis ma hagaajinayo deegaanka. Sidaa awgeed, qodobada deegaanka ka hadlaya yaanay ku koobnaan Wasaaradda Macdanta oo keliya. Waa in **Wasaaradda Deegaanka**, **Guddida Khayraadka**, **Golaha Guurtida**, iyo **Xeer-Ilaalinta Qaranku** dhammaantood door ku yeeshaan. Marka shirkaddu dhamayso hawsha macdan-baadhista, deegaanka waa in sidii hore loogu soo celiyaa, waayo waa deegaanka aynu ku noolaanayno maanta iyo berriba.

**Qodobka 3aad:** Waxaan doonayaa inaan taariikhdeenna idin xusuusiyo. Hore waxaynu u ahayn ummad qabaa'il ah oo kala go'an. Maamulkii Ingiriiska ayaa isku keenay, wuxuuna sameeyey degmooyin si dadka loo mideeyo. Maanta, se, tuulooyin badan ayaa la abuurayaa, taas oo kala qaybinaysa bulshada. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **xeerkan aanu ka gudbin gobol iyo degmo**, tuulo se aan lagu darin, maadaama ay keento kala fogaansho iyo khilaaf.

**Qodobka 4aad:** Xeerkan waxa uu dhigayaa in dawladdu khasab u samaysato shirkad macdan, taasina ma aha mid qasab ah. Dawladdu way samaysan kartaa shirkad hadii ay u

aragto, balse xeerku ma khasbi karo. Nidaamkeennu ma aha shuuci; dawladdu waa inay **ganacsiga dhiirrigelisaa**, ilaalisaa, kormeertaa, balse aanay ku khasbin shirkad samaynteeda. Sidaa darteed, qodobkaas waan diidanahay. Intaas ayaan ku soo gunaanadayaa. **Asalaamu Calaykum.**

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Badheedhe** **(08 daqiiqo, 05 ilbiriqsi):** Guddoomiye iyo Golaha labadiinuba waad mahadsan tihiin. Anigu, Cabdiraxmaan ahaan, maadaama aan ka soo jeedo deegaan macdan leh, khibrad baan u leeyahay arrimaha macdanta iyo hawl-galkeeda. Waxaan la macaamilay Wasaaradda Macdanta, marar badanna waan u gudbiyey codsiyo macdan-qodis ah.

Ilaa iminka, waxaad mooddaa inaanay jirin **sal-dhig cad**. Sida Guddoomiye-ku-xigeenku ka hadlay liisamada, arrintaasi waa mid sax ah. Habka saxda ahi waa in marka hore la bixiyo **liisan sahaminta** muddo kooban, ka dibna natiijada sahaminta Wasaaradda loo gudbiyo, halkaas oo lagu caddeeyo tirada, tayada iyo nooca macdanta. Markaas kaddib ayaa la bixiyaa liisanka qodista. Hase yeeshee, muddo ku dhow **30 sano**, wax muuqda oo dalka ka qabsoomay ma jiraan.

Had iyo goor **Wasaaraddu** way u jirtaa shirkad dalka doonaysa inay **maal-gashato**. Shirkaddu waa inay **la xidhiidhaa Wasaaradda**, oo ay tidhaa: *cooperation* baan doonayaa, waxaasaan doonayaa. Waa in **warbixinnadii (reports)** iyo **galalkii (files)** la soo saaraa. Iska daa wax la soo saaraye, **kuwa aanu annagu keenay baanu hubnaa inaanay Wasaaradda oollin**.

Ilaa hadda (*so far*), **hal mashruuc** baanu hirgelinay aniga iyo kuwo **Australian** ah, oo aanu ka hirgelinay **jasiiraddeenna yar ee Rabshiga** la yidhaahdo, ee **Maydh** ku taalla. Rabshiga waad ogtihiin; waa **xaar shinbireed**. Waa wixii **Dagaalkii Koowaad ee Adduunka** ganacsigiisu ka dhacay—xaarka shinbiraha. Marbaa **dahabka madow** la odhan jiray; maanta waa **fertilizer-ka** dalalka **Ruushka iyo Ukraine**, oo iyagu ahaa kuwii fertilizer-ka ugu badan soo saari jiray. Maaddaama dagaal ka jiro, **qiimaha fertilizer-ka adduunka boqol-laab buu kacay**. Somaliland dhibta ina haysata—beeraha oo aan u bixin—fertilizer-kaas ayaa ka mid ah.

Halkaa annagu waanu **sahaminay**, **tayadiisana (quality)** waanu keenay, **buug dhan oo 50 bog ah** ayaanu ka samaynay, **kharash aad u badan** ayaana naga galay. **Shaybaarro (labs)** badan oo adduunka ah ayaanu u dirnay—qiyaastii **$650,000**—taasina waa korka ka saaran. Iska daa wax kale; **dhagaxuu gala, godad buu gala**. **Quality iyo quantity** labadaba waanu diyaarinay. **Warbixintii aan qoray**, haddaad Wasaaradda tagtaan, **warbixintii 2013-kii** ee shirkaddaas sahamisay waa la heli lahaa. Annagu waxa aanu u baahnayn **suuq-geyn**, hase yeeshee maanta **lagama heli karo**.

Ayaan-darro, Wasaaradaha marka qof ka tago—haddii uu yahay **Agaasime Guud** ama **Agaasime**—**records-kii** wuu la baxaa. **Sample** aan keenay oo la yidhi waa *classic*, oo aan

ugu talo-galnay inay ummadda u noqdaan *samples* oo Wasaaradda lagu dhigo—**lix bilood ka dib ma oollin**. Sidaas darteed, wax badan baa inaga khaldan. Waxaan qabaa inaynu **si aad ah u fiirino**, **nidaamkeenna**na **hagaajino**.

Wasiirka hadda joogaana **layaab ma leh**; kuwii ka horreeyeyna **waa la mid**. Hoos-u-socod baa jira, **isbeddel badanna** waa la sameeyaa: **Directors** iyo **Geologists** maalinba mid baa tegaya. Waxa ugu horreeya waa in **arkiifiyada (archives)** iyo **dukumentiyada (documents)** la hagaajiyo. Marka adigoo hebel ah aad timaaddo oo **record-kii** la waayo—**todobaadkii ugu dambeeyey**—intaas oo shirkadood baa ila soo xidhiidhay; waxay yidhaahdeen: *waxaan doonaynaa inaan suuqa ka raadino*, kolba qof yar la xidhiidho oo la yidhaahdo: *Hebelow, maxaad haysaa?*—laakiin **wax halkan yaalla weli lama arag**, iyadoo la leeyahay *waxaas ayaanu ku feed-gareynaynaa*.

Wasaaraddu waxay igu tidhi: **laba shir** oo **Koonfur Afrika** ka dhacay baanu la tagnay; **bilyano doollar** ayaa inoogu jira haddii aynu **process-kooda** bilowno—waa **fertilizers first-class**, waliba **organic** ah. Sidaa darteed, **dadaal** baa inagu waajibay inaanu **Wasiirka iyo Wasaaradda la-talinno**, waxna u hagaajino. Waad maqlayseen maalmahan dhaw—**shidaalka**—Wasiirkeennii hore markii shidaalka laga waraysanayay; **seismic** dhawr jeer baa la sameeyaa, waana kii Wasiirku yidhi **hal ceel qodis** baa ku kacaysa **$50 milyan**, sampling-kana waa la samaynayaa.

Sidaa awgeed, waxaan qabaa **inaanay "gaaladu" ina hagin**; **system-kan** waa mid ay iyagu hore ugu mareen. Haddii maanta ay **macdan** kaa doonayaan oo ay yidhaahdaan *konteenar baan sample ahaan u qaadanayaa*, konteenarkaas **malaayiin doollar** buu gaadhi karaa—**caqli-gal ma aha**.

Markaa waxaan leeyahay: **aqoonteennu waynu leenahay**, **dalkeenna**na waa inaynu u dadaalnaa; **Wasaaraddeenna** waa inaynu la-talinaa, waxna u hagaajinaa. Nidaamyo ayay samaysteen si **aan la isu boobin**; sidaas awgeed, **si aad ah ha loo fiirsado**. Taasi ayaan ku talinayaa. **Doodda wixii ka dambeeya gadaal baan ka gelayaa. Waad mahadsan tihiin.**

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------- |